Ku dhaqan Xafiis D.

# FAAFINTA RASMIGA AH
# OFFICIAL BULLETIN
# الجريدة الرسمية

## EE JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

**Ururinta Sharciyada iyo Wareegtooyinka ee Janaayo – Disembar 2013**

**Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah**
**Ee Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda**

**FAAFIN[illegible] SOO BAXA**

Qiimaha waa $XXX Dollar, lambar waliba – **RUKUNKA**: Sanaddii waa $XXX Dollar, Soomaaliya gudaheeda – Dibaddeedana waa $XXX Dollar. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo. Qiimaha Qoritaanku F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa $XXX Dollar – Rukunka iyo Qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah – Lacagta waxaa lagu bixiniyaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Maaliyadda.

## KOBNIIN

**BOGGA KOOWAAD**

**SHARCI**

W.M

**BOGGA LABAAD**

**XEER**

# 2013

**XEER MADAXWAYNAHA Lr. 30** Taariikh: 05/01/2013
Oggolaanshaha Miisaaniyad Sanadka 2013 Bog 1

**XEER MADAXWAYNAHA Lr. 31** Taariikh: 13/01/2013
Oggolaansho Dil Toogasho Bog 2

**XEER MADAXWAYNAHA Lr. 32** Taariikh: 13/01/2013
Magacaabis Gudoomiyaha Bankiga Dhexe Bog 4

**XEER MADAXWAYNAHA Lr. 42** Taariikh: 04/02/2013
Magacaabis Guddiga KMG ee Gobolka Baay & Degm. Baydhabo Bog 5

**XEER MADAXWAYNAHA Lr. 46** Taariikh: 12/02/2013
Magacaabis Gudoomiyaha Somali Airlines Bog 7

**XEER MADAXWAYNAHA Lr. 48** Taariikh: 14/02/2013
Oggolaansho Dil Toogasho Bog 8

**XEER MADAXWAYNAHA Lr. 49** Taariikh: 14/02/2013
Oggolaansho Dil Toogasho Bog 10

**XEER MADAXWAYNAHA Lr. 51** Taariikh: 03/03/2013
Magacaabidda Guddiga KMG ee Gobolka Hiraan iyo Degmada Beledweyne Bog 12

**XEER MADAXWAYNAHA Lr. 54** Taariikh: 09/03/2013
Magacaabid Jagooyin Sare Saraakiil Bog 14

**XEER MADAXWAYNAHA Lr. 57** Taariikh: 19/03/2013
Dallacsiin Sarkaal Bog 15

**XEER MADAXWAYNAHA Lr. 58** Taariikh: 19/03/2013
Magacaabid Nootaayo Bog 16

**XEER MADAXWAYNAHA. 59** Taariikh: 25/03/2013
Ku Wareejin Ciidanka Booliiska Bog 17

**XEER MADAXWAYNAHA Lr. 60** Taariikh: 25/03/2013
Ogolaansho Istiqaalad Bog 18

**XEER MADAXWAYNAHA . 61** Taariikh: 25/03/2013
Oggolaansho Istiqaalad Bog 19

**XEER MADAXWAYNAHA Lr.62** Taariikh: 25/03/2013
U Magacaabid ku- Meel Gaar HSNQ Bog 20

**XEER MADAXWAYNAHA Lr. 63** Taariikh: 25/03/2013
Oggolaansho Istiqaalad Bog 21

**PRESIDENTIAL DECREE No.64** DATE: 11/04/2013
Appointment of a Senior Advisor & Spokesperson for the Presidency Bog 22

**XEER MADAXWAYNAHA Lr. 66** Taariikh: 16/04/2013
Ku Wareejin Ciidanka Booliska Bog 23

**XEER MADAXWAYNAHA Lr. 68** Taariikh: 02/05/2013
Magacaabid S/Guuto iyo Taliyaha Ciidanka Cirka Bog 24

**XEER MADAXWAYNAHA Lr. 69** Taariikh: 02/05/2013
Magacaabid Agaasimaha Guud ee Haya'adda Sirdoonka iyo Nabadsugidda Qaranka Bog 25

**XEER MADAXWAYNAHA Lr. 71** Taariikh: 02/05/2013
Magacaabid Taliyaha Ciidanka Booliiska Bog 26

**XEER MADAXWAYNAHA Lr. 72** Taariikh: 11/06/2013
Magacaabid Garyaqaanka Guud Bog 27

**XEER MADAXWAYNAHA Lr. 73** Taariikh: 18/05/2013
Magacaabidda Gudoomiye ku-xigeenka Labaad Ee Maamulka iyo Maaliyadda Gobolka Hiiraan Bog 28

**PRESIDENTIAL DECREE No.74** DATE: 23/05/2013
Appointment of a Petroleum & Mineral Resources Senior Advisor to the Presidency Bog 29

**XEER MADAXWAYNAHA Lr. 76** Taariikh: 11/06/2013
Magacaabid Nootaayo Bog 30

**XEER MADAXWAYNAHA Lr. 81** Taariikh: 22/06/2013
Magacaabid Nootaayo Bog 31

**XEER MADAXWAYNAHA Lr. 82** Taariikh: 22/06/2013
Magacaabid Nootaayo Bog 32

**PRESIDENTIAL DECREE No.83** DATE: 30/06/2013
Appointment of a Regional Affairs Advisor for the Presidency Bog 33

**XEER MADAXWAYNAHA Lr. 84** Taariikh: 13/07/2013
Ku Soo Wareejin Sarkaal Ciidamada Asluubta Bog 34

**XEER MADAXWAYNAHA Lr. 85** Taariikh: 13/07/2013
Magacaabid Nootaayo Bog 35

**XEER MADAXWAYNAHA Lr. 86** Taariikh: 13/07/2013
Magacaabid Nootaayo Bog 36

**PRESIDENTIAL DECREE No. 88** DATE: 19/07/2013
Appointment of Strategic and Special Assignments Advisor for the Presidency Bog 37

**XEER MADAXWAYNAHA Lr. 98** Taariikh: 29/07/2013
Magacaabid Taliyaha Ciidanka Asluubta Soomaaliyeed Bog 38

**XEER MADAXWAYNAHA Lr. 102** Taariikh: 30/07/2013
Magacaabid Gudoomiyaha Haya'adda Dib-u-soocelinta & Dib-u-dejinta Qaxootiga iyo Barakacayaasha Qaranka Bog 39

**XEER MADAXWAYNAHA Lr. 108** Taariikh: 07/08/2013
Dallacsiin Sarkaal iyo u Magacaabid Abbaanduule Bog 40

**XEER MADAXWAYNAHA Lr. 116** Taariikh: 06/08/2013
Oggolaanshaha Sharciga Degmooyinka iyo Gobolada Dalka
Lifaaq: Sharciga Maamullada Degmooyinka iyo Gobollada Dalka Bog 41

**XEER MADAXWAYNAHA Lr. 118** Taariikh: 07/08/2013
Oggolaanshaha Ansixinta Heshiiska Soomaaliya iyo Turkiga kuna saabsan Tababarrada Ciidamada iyo Bog 62
Protocol-ka iskaashiga Jamhuuriyadda Soomaaliya iyo Jamhuuriyadda Turkiya

**XEER MADAXWAYNAHA Lr. 119** Taariikh: 07/08/2013
Oggolaanshaha Ansixinta Sharciga Guddiga Madaxabannaan Ee Dib u eegista iyo Hirgelinta Dastuurka Bog 73
Lifaaq: Sharciga Guddiga Madaxabannaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka

**XEER MADAXWAYNAHA Lr. 113** Taariikh: 05/09/2013
Dallacsiin Sarkaal Bog 80

**XEER MADAXWAYNAHA Lr. 114** Taariikh: 07/09/2013
Oggolaanshaha HeshiiskaCotonou
Lifaaq: Oggolaanshaha Heshiiska Cotonou Bog 81

**XEER MADAXWAYNAHA Lr. 117** Taariikh: 29/09/2013
Dib ula wareegid Dhul Danguud Bog 87

**PRESIDENTIAL DECREE No. 107** DATE: 01/10/2013
Appointment of a presidential senior Legal adviser on international law Bog 88

**XEER MADAXWAYNAHA Lr. 120** Taariikh: 23/10/2013
Magacaabid La-Taliyaha Madaxweynaha JFS Bog 89
Ee Arrimaha Maamul Goboleedyada

**XEER MADAXWAYNAHA Lr. 122** Taariikh: 06/10/2013
Magacaabid La-Taliyaha Madaxweynaha JFS ee Bog 90
Xagga ka hortagga argagixisada

**XEER MADAXWAYNAHA Lr. 124** Taariikh: 04/11/2013
Oggolaansho Dil Toogasho Bog 91

**XEER MADAXWAYNAHA Lr. 125** Taariikh: 09/11/2013
Magacaabid Garsoorayaal Maxkamadda CQS Bog 93

**XEER MADAXWAYNAHA Lr. 126** Taariikh: 12/11/2013
Magacaabid Nootaayo Bog 95

**XEER MADAXWAYNAHA Lr. 127** Taariikh: 12/11/2013
Magacaabid Nootaayo Bog 96

**XEER MADAXWAYNAHA Lr. 128** Taariikh: 16/11/2013
Magacaabid Taliyaha Ciidanka Badda Bog 97

**XEER MADAXWAYNAHA Lr. 129** Taariikh: 19/11/2013
Magacaabid Gudoomiyaha Hay'adda Cilmi Bog 98
Baarista Badaha Soomaaliyeed

**XEER MADAXWAYNAHA Lr. 130** Taariikh: 21/11/2013
Magacaabid La taliyaha Madaxweynaha JFS ee Arimaha Gobolada Bog 99

**XEER MADAXWAYNAHA Lr. 131** Taariikh: 24/11/2013
Magacaabid La taliyaha Madaxweynaha JFS ee Arrimaha Bulshada Bog 100

**PRESIDENTIAL DECREE No. 132** DATE: 30/10/2013
Appointment of an interim governor for the central bank of Somalia Bog 101

**XEER MADAXWAYNAHA Lr. 133** Taariikh: 12/12/2013
Magacaabis Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Bog 102
Federaalka Soomaaliyeed

**XEER MADAXWAYNAHA J.F.S Lr. 30** Taariikh: 05/01/2013

**Oggolaanshaha Miisaaniyad Sanadka 2013**

**MADAXWAYNAHA J.F.S.,**

**Markuu Arkay:** Qodobka 87aad, Xarafka "C" iyo Qodobka 90aad Farqadda 6aad ee Dastuurka J.F.S.

**Markuu Arkay:** Xeerka Baarlamaanka ee Habraaca Maaliyadda iyo Xisaabta Lr. 2 soona baxay 29/12/1961.

**Markuu Arkay:** Warqadda Wasiirka koowaad Lr. XRW/00171/12/12 ee 17/12/2012 kuna saabsan u soo gudbinta Miisaaniyadda Golaha Shacabka.

**Markuu Arkay:** Warqadda Wasiirka Maaliyadda Lr. MoF, P&LC/473/2012 ee 29/12/2012 kuna saabsan is beddelka lagu sameeyay Miisaaniyadda 2013.

**Markuu Arkay:** Warqadda Guddoomiyaha Golaha Shacabka Lr. 188-XG-12-12 ee 31/12/2012 kuna saabsan Ansixinta Miisaaniyadda 2013 ee Golaha Shacabka Fadhigooda 1aad, Kulanka 43aad ee 30/12/2012.

**Isaga oo Tixgelinaaya:** Inay dan u tahay Dalka iyo Dadkaba inuu meel-mariyo saxiixada na Miisaaniyaddaan 2013.

**Wuxuu soo saaray Xeerkaan:**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo Maalinta uu Madaxweynaha Jamhuuriyadda Soomaaliya Saxiixo Xeerkaan, Waxaa la meel mariyay Miisaaniyadda 2013.

**Qodobka 2aad**

Waxaa loo oggolaaday Xukuumadda Federaalka ee Soomaaliya inay ku dhaqanto, qiimayso iyo inay tixgeliso shuruucda Dalka, gaar ahaan dakhliga iyo kharashka Dawladda sida ku cad qiimaynta Miisaaniyadda 2013.

**Qodobka 3aad**

Wuxuu Xeerkaan dhaqangelayaa Maalinta uu Madaxweynaha Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya saxiixo, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Soomaaliya.

**MUQDISHO 05/01/2013**

**Madaxweynaha J.F.S.**

**Xasan Sheekh Maxamuud**

**MADAXWAYNAHA J.F.S**

**Markuu Arkay:** Qodobka 87, Xarafka 'C' iyo Qodobka 90aad, Faqradda 6aad ee Dastuurka J.F.S.

**Markuu Arkay:** Qodobka 90aad ee Dastuurka J.F.S.

**Markuu Arkay:** Xeer Madaxweyne Lr. 6 ee soo baxay 30/10/1969 kuna saabsan Habka Dilka Dembiilaha ay xukuntay Maxkamadda Ciidamada.

**Markuu Arkay:** Codsiyada ku kala xusan Warqadaha Xeer ilaaliyaha Lr. XG/MCQS/41/2013 ee 12/01/2013 iyo XG/MCQS/042/2013 ee 12/01/2013 kuna saabsan Dil Bareer ah iyo Kufsi

**Markuu Arkay:** Xukunnada Maxkamadda CQS ee kala ah : 697/2010 ee 29/12/2010 iyo 136/2011 ee 11/09/2011.

**Markuu Arkay:** Qodobka 434aad Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed iyo 19aad ee Xeerka Ciqaabta Ciidamada Qalabka sida ee Soomaliya iyo Qodobada kala ah 398aad ee XCQ iyo 329aad XCCQS.

**Markuu Tixgeliyay:** In loo baahan yahay in la badbaadiyo Dadweynaha Soomaaliyeed bacdamaa ay Dawladda aaminsan tahay sida uu qabo Dastuurka in la daryeelo Nolosha Aadamigaa, gaar ahaan in la badbaadiyo dadka ay ku dhacdo dhibaatada ugu badan, sida dumarka iyo in lala dagaallamo anshax xumida.

**Wuxuu soo saaray Xeerkaan**

## Qodobka 1aad

Laga billaabo Maalinta uu Madaxweynaha saxiixo Xeerkaan ku saabsan Dil-Toogasho wuxuu oggolaaday in lagu fuliyo Dil Toogasho Dambiile **Jamaal Axmed Cabdulqaadir**, kana tirsanaan jiray Ciidanka Booliiska kaasi oo si bareer ah u dilay **Maxamed Axmed Caddow** iyo Dambiile **Cabdi Cismaan Cali Xasan** oo ka tirsanaan jiray Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed kaasi oo u geystay fal-kufsiyeed Gabadha lagu magacaabo **Nuuro Caddow Shire**.

## Qodobka 2aad

Waxaa Xeer-ilaalinta iyo Maxkamadda Ciidamada Qalabka sida la farayaa inay Galalkooda u gudbiyaan Wasaaradda Arrimaha Gudaha & Amniga iyo Wasaaradda Gaashaandhigga sida uu qabo Xeerka Lr. 6 ee soo baxay 30/10/1969.

## Qodobka 3aad

Wuxuu Xeerkaan Dhaqan-gelayaa maalinta uu Madaxwaynaha saxiixo waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyada Soomaaliya.

**MUQDISHO 13/01/2013**

**Madaxweynaha J. F. S.**
**Maxamed Xasan Sheekh Maxamuud**

**XEER MADAXWAYNAHA Lr. 32** Taariikh: 13/01/2013

Magacaabid Guddoomiyaha Bankiga Dhexe

**MADAXWAYNAHA J.F.S**

**Markuu Arkay:** Qodobka 87, Xarafka 'C', Qodobka90aad Faqradda 12aad iyo 99aad, Xarafka "G"

**Markuu Arkay:** Soo Jeedinta Ra'iisul Wasaaraha ee ku socotay G/Wasiirrada Lr. XRW/MGC/00011/01/13 iyo Warqadda uu Ra'iisul Wasaaraha kaga codsanayo Madaxweynaha in uu ku soo saaro Xeer Madaxweyne ee Lr. XRW/MGC/00012/13 oo ay labaduba ku taariikhaysan yihiin 12/01/201.

**Markuu Garwaaqsaday**: Inay jirto baahi loo qabo in Hay'adaha Dawladda loo magacaabo Mas'uul aqoon iyo tayo sare leh, sida Bankiga Dhexe ee Qaranka.

**Wuxuu soo saaray Xeerkaan**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo maalinta uu Madaxweynaha saxiixo Xeerkaan, waxaa **Dr. Cabdisalan Cumar Hadliye** loo magacaabay in uu noqdo Gudoomiyaha Bankiga Dhexe ee Qaranka.

**Qodobka 2aad**

Waxa **Dr. Cabdisalaan Cumar** lagu maamuusayaa laguna dhaqayaa wixii xuquuq Shaqaale ee ku xusan Sharciga Shaqaalaha Rayidka ee Dawladda Soomaaliyeed Lr. 11 ee soo baxay 05/12/2006, darajadiisuna waa A/1.

**Qodobka 3aad**

Wuxuu Xeerkaan Dhaqan-gelayaa maalinta uu Madaxwaynaha saxiixo waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

**MUQDISHO 13/01/2013**

**Madaxweynaha J. F. S.**

**Xasan Sheekh Maxamuud**

**XEER MADAXWAYNAHA Lr. 42** Taariikh: 04/02/2013

**Magacaabid Guddiga KMG ee Gobolka Bay iyo Degmada Baydhabo**

**MADAXWAYNAHA J.F.S**

| | |
|---|---|
| **Markuu Arkay:** | Qodobka 87, Xarafka 'C', Qodobka90aad Xarafka "k" iyo 99aad, Xarafka "G" Dastuurka J.F.S. |
| **Markuu Arkay:** | Qodobka 94aad, Faqradda 1aad ee Dastuurka J.F.S kuna saabsan ku-Simaha Madaxweynaha J.F.S |
| **Markuu Arkay:** | Go'aanka Golaha Wasiirrada ee ah in loo sameeyo Maamul KMG ah ee Gobollada iyo Degmooyinka Dalka ee Lr. SHGW 21/01/13 |
| **Markuu Arkay:** | Warqadda Wasiirka Arrimaha Gudaha & Amniga Qaranka Lr. WAG & AQ/0071/13 ee 03/02/2013 kuna saabsan Maamulka ku meel gaarka ah ee Gobolka Bay iyo Warqadda ku lifaaqan oo ah soo jeedinta Odayaal dhaqameedyada ee Gobolka Bay kuna saxiixan yihiin. |
| **Markuu Ogaaday:** | Inay jirto baahi loo qabo in la billaabo dhisidda Maamul u samaynta Gobollada iyo Degmooyinka si looga sii ambaqaado Mustaqbalka inay dhismaan Dawlao Goboleedyo. |

**Wuxuu soo saaray Xeerkaan**

**Qodobka 1aad**

Wuxuu Madaxweynaha J.F.S. ansixiyay laga bilaabo maanta oo ah 04/02/2013 Maamulka Ku-meelgaarka ah ee Gobolka Bay oo jiri doona ilaa lix bilood.

**Qodobka 2aad**

Wuxuu Madaxweynaha ku ansixiyay isla Xeerkaan Magacyada iyo Jagooyinka ay soo ansixiyeen Odayaal dhaqameedyada, bacdamaa ay iyaga yihiin marjaca. Waxaa dib laga soo magacaabi doonaa Guddoomiye ku xigeenka 1aad ee Arrimaha Siyaasadda iyo Amniga. Magacyada Xubnaha la soo magacaabay iyo jagooyinka waxay kala yihiin sida soo socota:

1. Cabdi Aadan Hoosow — Guddoomiyaha Gobolka Baay
2. Mustaf Ibrahim Cali Sanbur — Guddoomiye Ku-xigeenka Maamulka iyo Maaliyadda
3. Ibraahim Xuseen Xasan — Guddoomiye Ku-xigeenka Arrimaha Bulshada

**Qodobka 3aad**

Waxaa kale oo Xeerkaan lagu magacaabay iyada oo la raacaayo soo jeedinta oday-dhaqameedyada Gobolka Baay kuna saabsan magacaabista Xubnaha Maamulka Degmada Baydhabo, waana kuwan magacyadooda hoos ku xusan:

1. Xasan Macallin Axmed "Biikalo" — Gudoomiyaha Degmada Baydhabo
2. Cabdulqaadir Sh. Cali Aadan "Baraka — Gudoomiye Ku-Xigeenka Siyaasadda & Amniga.
3. Max'ed Macallin Ibrahim"Dhalidhere" — Guddoomiye Ku-xigeenka Maamulka & Maaliyadda
4. Sandheere Maxamed Iftiin — Guddoomiye ku-xigeenka Arrimaha Bulshada
5. Axmed Maadey Isaaq — Xoghayaha Dawladda hoose ee Degmada Baydhabo.

**Qodobka 4aad**

Wuxuu Xeerkaan u dhaqan gelayaa si degdeg ah maalinta uu Madaxweynaha saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

**MUQDISHO 04/02/2013**

Madaxwaynaha J.F.S
Xasan Sheekh Maxamuud

*(Waxaa Madaxweynaha u saxiixay Guddoomiyaha Baarlamaanka ahna Ku-Simaha Madaxweynaha J.F.S. Mudane Maxamed Sheekh Cusmaan Jawaari)*

*Wasiirka Arrimaha Gudaha iyo Amniga Qaranka*
*Mudane C/kariin Xasan Guuleed*

**XEER MADAXWAYNAHA Lr. 46** Taariikh: 12/02/2013

**Magacaabid Guddoomiyaha Somali Airlines**

## MADAXWAYNAHA J.F.S

**Markuu Arkay:** Qodobka 87, Xarafka 'C', ee Dastuurka J.F.S.

**Markuu Arkay:** Xeer Lr.2 ee 17/12/1979 ee ku saabsan Somali Airlines

**Markuu Arkay:** Sharciga Shaqaalaha Rayidka ee Dawladda Lr. 11 ee 05/12/2006

**Markuu Arkay:** Xeer Madaxweyne Lr. 141 ee 03//05/2012 kuna saabsan Somali Airlines.

**Markuu Arkay:** Inay muhiim tahay in dib loo soo celiyo Tas-hiilaadkii Qaranka, sidaas darteedna waajib tahay in Dawladda J.F.S. ay dib u soo celiso Adeegyada loo qabto dadka.

**Markuu Tixgeliyay:** In dib loo hawl geliyo Shirkadda Qaranka ee Somali Airlines.

### Wuxuu soo saaray Xeerkaan

### Qodobka 1aad

Waxaa Xeerkaan lagu magacaabay Guddoomiyaha Shirkadda Somai Airlines, **Mudane Maxamuud Maxamed Guuleed**, iyada oo laga faa'iidaysanayo waayo-aragnimadiisa, bacdamaa uu muddo dheer hoggaanka u hayay, hormuudna ka ahaa horumarinta Shirkadda Somali Airlines.

### Qodobka 2aad

Waxaa Xeerkaan lagu baabi'iyay sharci ama xeer kasta oo ka hor imaanaya

### Qodobka 3aad

Wuxuu Xeerkaan Dhaqan-gelayaa marka uu Madaxwaynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya saxiixo, waxaana lagu soo daabacayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

**MUQDISHO 12/02/2013**

Republic of Somalia

**Madaxweynaha J. F. S.**

**Mudane Xasan Sheekh Maxamuud**

**XEER MADAXWAYNAHA Lr. 48** Taariikh: 14/02/2013
**Oggolaansho Dil Toogasho**

**MADAXWAYNAHA J.F.S**

**Markuu Arkay:** Qodobka 87, Xarafka 'C' iyo Qodobka 90aad, Faqradda 6aad ee Dastuurka J.F.S.

**Markuu Arkay:** Xeer Madaxweyne Lr. 6 ee soo baxay 30/10/1969 kuna saabsan Habka Dilka Dembiilaha ay xukuntay Maxkamadda Ciidamada.

**Markuu Arkay:** Codsiyada ku kala xusan Warqadaha Xeer ilaaliyaha Lr. XG/MCQS/200/2013.

**Markuu Arkay:** Xukunka Maxkamadda CQS Lr. 139/2010 ee 25/01/2010 kuna saabsan Xukunka dilka ah ee Xukunsane Ex Labo Xiddigle Xoogga Dalka **Cabdirashiid Cali Xasan**, ina Xaliimo Raage.

**Markuu Arkay:** Qodobka 434aad Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed iyo 19aad ee Xeerka Ciqaabta Ciidamada Qalabka sida.

**Markuu Tixgeliyay:** In loo baahan yahay in la badbaadiyo Dadweynaha Soomaaliyeed bacdamaa ay waajib ku tahay in la babdaadiyo Nolosha Dadka Soomaaliyeed iyada oo la dhowraayo in uu qof kasta xaq u leeyahay nolol, sida uu qabo Qodobka 13aad ee Dastuurka J.F.S.

**Wuxuu soo saaray Xeerkaan**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo Maalinta uu Madaxweynaha saxiixo Xeerkaan ku saabsan Dil-Toogasho wuxuu oggolaaday in lagu fuliyo Dil Toogasho Dambiile **Cabdirashiid Cali Xasan** oo horey uga tirsanaa Xoogga Dalka, kaasi oo si bareer ah u dilay Marxuum **Cali Cabdi Muxyidiin** markii ay taariikhdu ahayd 27/12/2009.

**Qodobka 2aad**

Waxaa Xeer-ilaalinta iyo Maxkamadda Ciidamada Qalabka sida la farayaa inay Galalkooda u gudbiyaan Wasaaradda Arrimaha Gudaha & Amniga Qaranka iyo Wasaaradda Gaashaandhigga sida uu qabo Xeerka Lr. 6 ee soo baxay 30/10/1969.

## Qodobka 3aad

Wuxuu Xeerkan Dhaqan-gelayaa maalinta uu Madaxwaynaha saxiixo waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyada Soomaaliya.

**MUQDISHO 14/02/2013**

Madaxweynaha J. F. S.
Mudane Xasan Sheekh Maxamuud

**MADAXWAYNAHA J.F.S**

**Markuu Arkay:** Qodobka 87, Xarafka 'C' iyo Qodobka 90aad, Faqradda 6aad ee Dastuurka J.F.S.

**Markuu Arkay:** Xeer Madaxweyne Lr. 6 ee soo baxay 30/10/1969 kuna saabsan Habka Dilka Dembiilaha ay xukuntay Maxkamadda Ciidamada.

**Markuu Arkay:** Codsiyada ku kala xusan Warqadaha Xeer ilaaliyaha Lr. XG/MCQS/200/2013.

**Markuu Arkay:** Xukunka Maxkamadda CQS Lr. 319/2010 ee 14/12/2011 kuna saabsan Xukunka dilka ah ee Xukunsanayaasha kal ah: **Ex Dable Cabbaas Cumar Kasiir** iyo **Ex D/LE Cabdullaahi Cumar Kasiir** oo labaduba walaalo ah.

**Markuu Arkay:** Qodobka 434aad Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed iyo 19aad ee Xeerka Ciqaabta Ciidamada Qalabka sida.

**Markuu Tixgeliyay:** In loo baahan yahay in la badbaadiyo Dadweynaha Soomaaliyeed bacdamaa ay waajib ku tahay in la babdaadiyo Nolosha Dadka Soomaaliyeed iyada oo la dhowraayo in uu qof kasta xaq u leeyahay nolol, sida uu qabo Qodobka 13aad ee Dastuurka J.F.S.

**Wuxuu soo saaray Xeerkaan**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo Maalinta uu Madaxweynaha saxiixo Xeerkaan ku saabsan Dil-Toogasho wuxuu oggolaaday in lagu fuliyo Dil Toogasho Dambiilayaasha kala ah: **Cabbaas Cumar Kasiir** iyo **Cabdullaahi Cumar Kasiir** oo horey labaduba uga tirsanaan jiray Xoogga Dalka, kuwaasi oo si bareer ah u dilay Marxuumiinta kala ah: Ex/D/LE **Shucayb Xasan Dhagoole, Maxamed Faarax Nuur** iyo **Casiiso Xasan Xuseen,** Waxayna dhaawaceen dadka kala ah: L/A Boliis 17601 **Daa'uud Xuseen Xasan** iyo **Ilyaas Daa'uud Xuseen** oo todobo jir ahaa Markii ay taariikhdu ahayd 22/09/2011, Wuxuu dilka iyo dhaawaca ka dhaceen Camps-a Qaxootiga ee ku yaalla Aagga Baar Bulsho.

**Qodobka 2aad**

Waxaa Xeer-ilaalinta iyo Maxkamadda Ciidamada Qalabka sida la farayaa inay Galalkooda u gudbiyaan Wasaaradda Arrimaha Gudaha & Amniga Qaranka iyo Wasaaradda Gaashaandhigga sida uu qabo Xeerka Lr. 6 ee soo baxay 30/10/1969.

**Qodobka 3aad**

Wuxuu Xeerkan Dhaqan-gelayaa maalinta uu Madaxwaynaha saxiixo waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyada Soomaaliya.

**MUQDISHO 14/02/2013**

**Madaxweynaha J. F. S.**
**Mudane Xasan Sheekh Maxamuud**

**XEER MADAXWAYNAHA Lr. 51** Taariikh: 03/03/2013

**Magacaabidda Guddiga Ku-meelgaarka ah ee Gobolka Hiiraan iyo Degmada Beledweyne**

**MADAXWAYNAHA J.F.S**

**Markuu Arkay:** Qodobka 87, Xarafka 'C', Qodobka 90, Xarafka "K" iyo 99aad, Xarafka "G" Dastuurka J.F.S.

**Markuu Arkay:** Warqadda Lr. WAG&AQ/XW/0080/13 Wasiirka Arrimaha Gudaha & Amniga oo soo xiganaayo go'aanka Golaha Wasiirrada ee ah in loo sameeyo Maamul ku-meel gaar ah Gobolada iyo Degmooyinka Dalka Lr. SHGW.21.01.13

**Markuu Ogaaday:** Inay jirto in baahi loo qabo in la bilaabo dhisidda Maamul u sameynta Gobolada iyo Degmooyinka si looga sii ambaqaado mustaqbalka inay dhismaan Dowlad-goboleedyada

**Wuxuu soo saaray Xeerkaan**

**Qodobka 1aad**

Wuxuu Madaxweynaha J.F.S ansixiyay laga bilaabo manta oo ah 03/03/2013 Maamulka ku-meelgaarka ee Gobolka Hiiraan iyo Degmada Beledweyne.

**Qodobka 2aad**

Wuxuu Madaxweynaha ku ansixiyay isla Xeerkaan Magacyada iyo jagooyinka isaga oo tixgelinaayo wadatashiga lala yeeshay qaybaha kala duwan ee Gobolka Hiiraan iyo Degmada Beledweyne, isla markaasina la siinaayo oday-dhaqameedyada iyo Xildhibaannada isla Gobolkaasi.

a) Gobolka Hiiraan

1. Cabdi Faarax Laqanyo - Guddoomiyaha Gobolka Hiiraan
2. Max'ed Ibraahim Cali (Sanbuur) - Gudoomiye Ku-xigeenka Koowaad ee Xagga Siyaasadda iyo Amniga
3. Maxamed Maxamuud Muumin - Guddoomiye Ku-Xigeenka Labaad ee Xagga Maamulka iyo Maaliyadda
4. Sheekh Xuseen Cusmaan Cali -Guddoomiye ku-xigeenka Sedexaad ee Xagga Arrimaha Bulshada

## Qodobka 3aad

Waxaa kale oo Xeerkaan lagu magacaabay iyada oo la raacaayo soo jeedinta Oday-Dhaqameedyada iyo Xildhibaanada Gobolka Hiiraan Mas'uuliyiinta Degmada Beledweyne, waana magacyada hoos ku xusan iyo jagadooda.

b)

| | |
|---|---|
| 1. Cabdi Bishaar Aadan | - Guddoomiyaha Degmada Beledweyne |
| 2. Cabdullaahi Maxamed Cumar | - Guddoomiye Ku-xigeenka Koowaad ee Siyaasadda iyo amniga |
| 3. Bashiir Xuseen Dhoorre | - Guddoomiye Ku-xigeenka Labaad ee Maamulka iyo Maaliyadda. |
| 4. Cabdikariin Shire Cabdi | -Gudoomiye Ku-xigeenka Sedexaad ee Arrimaha Bulshada |
| 5. Maxamed Macallin Xasan | - Xoghayaha Dowladda Hoose ee Degmada Beledweyne |

## Qodobka 4aad

Wuxuu Xeerkaan u dhaqan-gelayaa si degdeg ah maalinta uu Madaxwaynaha saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah.

**MUQDISHO 03/03/2013**

Republic of Somalia

Madaxweynaha J. F. S.
Xasan Sheekh Maxamuu

**XEER MADAXWAYNAHA Lr. 54** Taariikh: 09/03/2013

**Magacaabid Jagooyin Sare Saraakiil**

**MADAXWAYNAHA J.S**

**Markuu Arkay:** Qodobka 87, Xarfaha 'b' iyo 'c', iyo Qodobka 90aad, Faqradiisa 2 iyo 3 Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya.

**Markuu Arkay:** Xeer Lr. 15 ee soo baxay 6da Abriil 1960 kuna saabsan Dhismaha Xoogga Dalka Soomaaliyeed.

**Markuu Arkay:** Soo jeedinta Ra'iisul Wasaaraha ee Warqadda Lr. XRW/MJFS/00140/03/13 ee 07/03/2013.

**Markuu Tixgeliyay:** Hawlkarnimada, Geesinimada, wadaninimada iyo Hawsha amaanan ay u qabteen Xoogga Dalka Soomaaliyed oo ay manta ku faani karto Umadda.

**Wuxuu soo saaray Xeerkaan**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo markii ay taariikhdu tahay 09/03/2013 wuxuu Madaxweynaha u magacaabay saraakiisha ay magacyadooda hoos ku xusan yihiin jagooyinka ku hor qoran:

1. **S/Guuto Daahir Aadan Cilmi** – Taliyaha Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed
2. **S/Guuto Cabdirisaaq Khaliif Cilmi** -- Abaanduulaha Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed

**Qodobka 2aad**

Wuxuu Xeerkaan Dhaqan-gelayaa markii uu Madaxwaynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee Jamhuuriyadda Soomaaliya.

**MUQDISHO 09/03/2013**

**Madaxweynaha J. F. S.**

**Mudane Xasan Sheekh Maxamuud**

**XEER MADAXWAYNAHA Lr. 57** Taariikh: 19/03/2013
**Dallacsiin Sarkaal**

**MADAXWAYNAHA J. F. S**

| | |
|---|---|
| **Markuu arkay:** | Qodobka 87, Xarfaha 'b' iyo 'c' ee Dastuurka J.F.S |
| **Markuu arkay:** | Xeer Lr. 14 ee soo baxay 04/01/1973 kuna saabsan Shaqo ku soo celinta Ciidanka Booliska. |
| **Markuu Arkay:** | Soo jeedinta Taliyaha Ciidanka Booliska Somaaliyed TIR/XTC/2/12 ee 30/12/12 |
| **Markuu Tixgeliyay:** | Inuu horay uga tirsanaan jiray Ciidanka Booliiska Soomaaliyeed ka dibna noqday Xildhibaan ka tirsanaa Golaha Shacabka. |

Waxa uu soo saaray Xeerkaan

Qodobka 1aad

Laga bilaabo markii ay taariikhdu tahay 19/03/2013, waxaa dib loogu celiyay **G/le Mayow Sheekh Mukhtaar** Hawlaha Ciidanka Booliiska Soomaaliyeed oo horay uga tirsanaan jiray.

**Qodobka 2aad**

Wuxuu Xeerkaan tilmaamayaa in lagu qaato darajadiisa hore oo ahayd Gaashaanle

**Qodobka 3aad**

Wuxu Xeerkaan dhaqangelayaa markii uu Madaxweynaha Jamhuuriyadda Soomaaliya saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee Jamhuuriyadda Soomaaliya.

**MUQDISHO 19/03/2013**

**XEER MADAXWAYNAHA Lr. 58** Taariikh: 19/03/2013

**Magacaabid Nootaayo**

**MADAXWAYNAHA J.F.S**

**Markuu Arkay:** Qodobka 87, Xarfaha 'b' iyo 'c' ee Dastuurka J.F.S.

**Markuu Arkay:** Xeerka Lr. 1 ee soo baxay 02/03/1962 kuna saabsan hawlaha Nootaayaha

**Markuu Arkay:** Xeerka Lr. 7 ee soo baxay 02/02/1986 oo awood u siinaayo Madaxweynaha magacaabida Nootaayaha

**Markuu Arkay:** Soo jeedinta Wasaaradda Garsoorka, Arrimaha Diinta iyo Dastuurka, Warqada Lr. WGADDDHF/XW/E-12/179/2013

**Markuu Tixgeliyay:** Baahida loo qabo in loo magacaabo Hawlaha Nootaayaha Dad aqoon u leh Shuruucda iyo Xeerarka Dalka.

**Wuxuu soo saaray Xeerkaan**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo markii ay taariikhdu tahay 19/03/2013, waxaa loo magacaabay **Dr. Xuseen Maxamed Calasow** inuu ku yeesho Magaalada Muqdisho Xafiis Nootaayo.

**Qodobka 2aad**

Wuxuu **Dr. Xuseen Maxamed Calasow** ka hawlgelayaa Gobolka Benaadir, gaar ahaan magaalada Muqdisho.

**Qodobka 3aad**

Wuxuu Xeerkaan Dhaqan-gelayaa isla maalinta uu Madaxwaynaha saxiixo waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

**MUQDISHO 19/03/2013**

**Madaxweynaha J. F. S.**
**Mudane Xasan Sheekh Maxamuud**

**XEER MADAXWAYNAHA Lr. 59** Taariikh: 25/03/2013
**Ku Wareejin Ciidanka Booliiska**

## MADAXWAYNAHA J. F. S

| | |
|---|---|
| **Markuu arkay:** | Qodobka 87, Xarfaha 'b' iyo 'c' ee Dastuurka J.F.S |
| **Markuu arkay:** | Xeer Lr. 14 ee soo baxay 04/01/1973 kuna saabsan Shaqo ku soo wareejin Ciidanka Booliska Soomaaliyeed. |
| **Markuu Arkay:** | Soo jeedinta XTC/XDS,/048/13 ee Taliyihii hore CQS ee 23/01/2013 |
| **Markuu Tixgeliyay:** | Inuu horay uga tirsanaan jiray Ciidanka Q.S ee Dalka |

**Wuxuu soo saaray Xeerkaan**

### Qodobka 1aad

Laga bilaabo markii ay taariikhdu tahay 25/03/2013, waxaa **G/Sare Ismaaciil Axmed Cusmaan** lagu soo wareejiyay Ciidanka Booliska Soomaaliyeed.

### Qodobka 2aad

Wuxuu Xeerkaan tilmaamayaa in lagu qaato darajadiisa hore oo ahayd Gaashaanle Sare.

### Qodobka 3aad

Wuxu Xeerkaan dhaqangelayaa isla maalinta uu Madaxweynaha saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

**MUQDISHO 25/03/2013**

**MADAXWAYNAHA J. F. S**

| | |
|---|---|
| **Markuu Arkay:** | Qodobka 90, Xarfaha 'b' iyo 'c' ee Dastuurka J.F.S |
| **Markuu Tixgeliyay:** | Warqadda uu soo qortay Agaasimaha Hay'adda Sirdoonka & Nabadsugidda Qaranka kuna saabsan is-casilaaddiisa Lr. X/AG/HNQ/005/13 ee 24/03/2013 |

**Wuxuu soo saaray Xeerkaan**

**Qodobka 1aad**

Laga bilaabo markii ay taariikhdu tahay 25/03/2013, waxaa Agaasimaha Guud ee HSNQ **Mudane Axmed Macallin Fiqi** laga oggolaaday istiqaalada uu ka keenay hawsha qaran oo uu u haayay Hay'adda HSNQ

**Qodobka 2aad**

Waxaa Xeerkaan lagu farayaa Wasaaradda Arrimaha Gudaha & Amniga Qaranka in intii uu hawsha gacanta ku hayay in loo dhammaystiro Agaasimaha Guud wixii Xuquuq ah ee u bislaaday kuna leeyahay Qaranka.

**Qodobka 3aad**

Wuxu Xeerkan u dhaqangelayaa si degdeg ah markii uu Madaxweynaha saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya.

**MUQDISHO 25/03/2013**

**XEER MADAXWAYNAHA Lr. 61** Taariikh: 25/03/2013

**Oggolaansho Istiqaalad**

**MADAXWAYNAHA J. F. S**

**Markuu Arkay:** Qodobka 90, Xarfaha 'b' iyo 'c' ee Dastuurka J.F.S

**Markuu Tixgeliyay:** Warqadda uu soo qortay Taliyaha Agaasinka Gudaha ee Hay'adda Sirdoonka & Nabadsugidda Qaranka kuna saabsan is-casilaaddiisa Lr. X/AG/HNQ/0122/13 ee 24/03/2013

**Wuxuu soo saaray Xeerkaan**

Qodobka 1aad

Laga bilaabo markii ay taariikhdu tahay 25/03/2013, waxaa Taliyaha Agaasinka Gudaha ee HSNQ **S/Gaas Maxamed Xasan Aadan (Shaahiyow)** laga oggolaaday istiqaalada uu ka keenay hawsha qaran oo uu u haayay Hay'adda HSNQ

**Qodobka 2aad**

Waxaa Xeerkaan lagu farayaa Wasaaradda Arrimaha Gudaha & Amniga Qaranka in intii uu hawsha gacanta ku hayay in loo dhammaystiro Taliyaha Agaasinka Gudaha wixii Xuquuq ah ee u bislaaday kuna leeyahay Qaranka.

**Qodobka 3aad**

Wuxu Xeerkan u dhaqangelayaa si degdeg ah markii uu Madaxweynaha saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya.

**MUQDISHO 25/03/2013**

**XEER MADAXWAYNAHA Lr. 62** Taariikh: 25/03/2013
**U Magacaabid ku-meelgaar HSNQ**

**MADAXWAYNAHA J. F. S**

**Markuu Arkay:** Qodobka 90, Xarfaha 'b' iyo 'c' ee Dastuurka J.F.S

**Markuu Arkay:** Xeerarka Lr. 60 iyo 61 ee ku saabsan is-casilaadda Agaasimaha Guud iyo Taliyaha Agaasinka Gudaha ee Hay'adda HSNQ ee soo baxeen 25/03/13.

**Markuu Tixgeliyay:** In loo qabo baahi inay hawsha Hay'adda HSNQ horay loo sii wado

**Wuxuu soo saaray Xeerkaan**

**Qodobka 1aad**

Laga bilaabo markii ay taariikhdu tahay 25/03/2013, waxaa si ku meel-gaar ah loo magacaabay **S/Guuto Cabdikariim Daahir Xasan** inuu u noqdo si ku meel gaar Agaasimaha Guud ee Hay'adda HSNQ, Waxaa sidaasi oo kale loo magacaabay **Mudane Xuseen Macallin Maxamuud** inuu si ku meel-gaar ah u noqdo Hay'adda HSNQ, Ku-Xigeenka Agaasimaha Guud.

**Qodobka 2aad**

Waxaa Xeerkaan si ku meel-gaar ah loogu magacaabay **G/Sare Cismaan Xasan Cosoble** inuu noqdo Agaasimaha Amniga Gudaha. Waxaa kale oo isla Xeerkaan loogu magacaabay si ku meel-gaar ah **G/le Cabdullaahi Cabdi Aybakar** inuu noqdo Madaxa Baarista.

**Qodobka 3aad**

Waxaa kale oo si ku meel-gaar ah loogu magacaabay:

1. G/dhexe C/raxman Max'ed Turyare – Agaasimaha Amniga dibadda
2. G/le Liibaan Daahir Cabdullaahi - Madaxa Argagixiso la dirirka
3. G/le Haashim C/qaadir C/laahi - Madaxa Xiriirada
4. G/le Maxamed Bukhaari Axmed - Agaasimaha Hawlgelinta

**Qodobka 4aad**

Wuxu Xeerkan u dhaqangelayaa si degdeg ah markii uu Madaxweynaha saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya.

**MUQDISHO 25/03/2013**

**Oggolaansho Istiqaalad**

**MADAXWAYNAHA J. F. S**

**Markuu Arkay:** Qodobka 90, Xarfaha 'b' iyo 'c' ee Dastuurka J.F.S

**Markuu Tixgeliyay:** Warqadda uu soo qortay Taliye Ku-xigeenka Koowaad ee Hay'adda Sirdoonka & Nabadsugidda Qaranka kuna saabsan is-casilaaddiisa Lr. X/T/Xig/HNQ/221/12 ee 25/03/2013

**Wuxuu soo saaray Xeerkaan**

Qodobka 1aad

Laga bilaabo markii ay taariikhdu tahay 25/03/2013, waxaa Taliye Ku-Xigeenka Koowaad ee HSNQ **S/Gaas Xasan Cali Maxamed (X/dheere)** laga oggolaaday istiqaalada uu ka keenay hawsha qaran oo uu u haayay Hay'adda **HSNQ**

**Qodobka 2aad**

Waxaa Xeerkaan lagu farayaa Wasaaradda Arrimaha Gudaha & Amniga Qaranka in intii uu hawsha gacanta ku hayay in loo dhammaystiro Taliye Ku-Xigeenka Koowaad wixii Xuquuq ah ee u bislaaday kuna leeyahay Qaranka.

**Qodobka 3aad**

Wuxu Xeerkan u dhaqangelayaa si degdeg ah markii uu Madaxweynaha saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya.

**MUQDISHO 25/03/2013**

**PRESIDENTIAL DECREE No. 64** DATE: 11/04/2013

**Appointment of A Senior Advisor & Spokesperson for the Presidency**

## THE PRESIDENT OF THE FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

| | |
|---|---|
| **After Considering:** | Article 90, Paragraph 11 of the Constitution of the Federal Republic of Somalia |
| **Having Seen:** | The Experience and the CV of the appointee |
| **After Recognizing:** | The need for appointing a Senior Advisor & Spokesperson to the President. |

## DECREES THE FOLLOWING:

### Article 1

On the Date the President signs this Decree, Mr. Abdirahman Omar Osman, is appointed as the Senior Advisor & Spokesperson to the President.

### Article 2

This decree takes effect on the day it is signed by the President of the Federal Republic of Somalia and will be published in the Official Bulletin of the Fedeeral Republic of Somalia.

**MOGADISHO 11/04/2013**

**XEER MADAXWAYNAHA Lr. 66** Taariikh: 16/04/2013

**Ku Wareejin Ciidanka Booliiska**

## MADAXWAYNAHA J. F. S

| | |
|---|---|
| **Markuu arkay:** | Qodobka 87, Xarfaha 'b' iyo 'c' ee Dastuurka J.F.S |
| **Markuu arkay:** | Xeer Lr. 14 ee soo baxay 04/01/1973 kuna saabsan ku soo wareejin Ciidanka Booliska Soomaaliyeed. |
| **Markuu Arkay:** | Soo jeedinta Admiraalka Ciidamada Badda ee Warqadda Lr. 11 ee 03/02/2013 |
| **Markuu Arkay:** | Warqadda Taliyaha Ciidanka Booliska Soomaaliyeed ee Warqada Lr. TIR/XTC/2/17-40/13 ee 27/03/2013 |
| **Markuu Tixgeliyay:** | Inuu horay uga tirsanaan jiray Ciidamada Badda la qiray inuu ku habboon yahay inuu ka mid noqdo Ciidamada Booliska Soomaaliyeed. |

**Wuxuu soo saaray Xeerkaan**

### Qodobka 1aad

Laga bilaabo manta oo ay taariikhdu tahay 16/04/2013, waxaa **Gaashaanle Maxamed Yuusuf Cismaan** lagu soo wareejiyay Ciidanka Booliska Soomaaliyeed.

### Qodobka 2aad

Wuxuu Xeerkaan tilmaamayaa in lagu qaato darajadiisa hore oo ahayd Gaashaanle ka tirsan Ciidamada Badda ee Soomaaliyeed.

### Qodobka 3aad

Wuxuu Xeerkaan u dhaqangelayaa si degdeg ah markii uu Madaxweynaha saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

**MUQDISHO 16/04/2013**

**XEER MADAXWAYNAHA Lr. 68** Taariikh: 02/05/2013

**Magacaabid S/Guuto iyo Taliyaha Ciidanka Cirka**

**MADAXWAYNAHA J.F.S**

| | |
|---|---|
| **Markuu Arkay:** | Qodobka 87, Xarfaha 'b' iyo 'c', Dastuurka J.F.S. |
| **Markuu Arkay:** | Xeer Lr. 15 ee soo baxay 6da Abriil 1960 kuna saabsan Dhismaha Xoogga Dalka Soomaaliyeed. |
| **Markuu Arkay:** | Soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Gaashaandhigga ee XJFS Lr. WG/00264/2012 ee 23/04/2013. |
| **Markuu Arkay:** | Soo jeedinta Taliyaha Xoogga Dalka Soomaaliyeed Lr. XTC/XDS/055/13 ee 22/04/2013. |
| **Markuu Tixgeliyay:** | Inuu horay uga tirsanaan jiray Ciidanka Cirka khibradna u leeyahay Hawlaha Ciidanka Cirka. |

**Wuxuu soo saaray Xeerkaan**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo markii ay taariikhdu tahay 02/05/2013 waxaa loo dallacsiiyay **G/le Sare Maxamuud Sheekh Cali Maxamed** inuu noqdo S/Guuto ee Ciidanka Cirka ee J.F.S

**Qodobka 2aad**

Waxaa isla Xeerkaan loogu magacaabay **S/Guuto Maxamuud Sheekh Cali Maxamed** Taliyaha Ciidanka Cirka ee J.F.S

**Qodobka 3aad**

Wuxuu Xeerkaan u Dhaqan-gelayaa si degdeg ah markii uu Madaxwaynaha saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

**MUQDISHO 02/05/2013**

**XEER MADAXWAYNAHA Lr. 69** Taariikh: 02/05/2013
**Magacaabid Agaasimaha Guud ee Hay'adda Sirdoonka & Nabadsugidda Qaranka**

## MADAXWAYNAHA J. F. S

| | |
|---|---|
| **Markuu Arkay:** | Qodobka 87, Xarfaha 'b' iyo 'c' ee Dastuurka J.F.S |
| **Markuu Arkay:** | Qodobka 100aad, Xarfihiisa 'a' iyo'd' ee Dastuurka |
| **Markuu Arkay:** | Xeer Lr. 14 ee soo baxay 15 Febaraayo 1970, ku saabsan Dhismaha Hay'adda Nabadsugidda Qaranka. |
| **Markuu Arkay:** | Soo jeedinta Ra'iisul Wasaaraha ee Warqadda Lr. XRW/MGC/00041/04/13 ee 02/05/2013, kuna saabsan go'aanka Golaha Wasiirada Lr. SHG/00/26/4/13 ee ku saabsan Magacaabista Agaasimaha Guud ee Hay'adda Nabadsugidda Qaranka. |
| **Markuu Tixgeliyay:** | Hawlkarnimada iyo hawsha waayo-aragnimada leh uu waqti dheer u leeyahay. |

**Wuxuu soo saaray Xeerkaan**

### Qodobka 1aad

Laga bilaabo markii ay taariikhdu tahay 02/05/2013, wuxuu Madaxweynaha oggolaaday soo jeedinta Golaha Wasiirada wuxuuna Xeerkaan ku magacaabay **S/Gaas Bashiir Maxamed Jaamac** inuu noqdo Agaasimaha Guud ee Hay'adda Nabadsugidda Qaranka

### Qodobka 2aad

Wuxu Xeerkan u dhaqangelayaa si degdeg ah markii uu Madaxweynaha saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya.

**MUQDISHO 02/05/2013**

**XEER MADAXWAYNAHA Lr. 71** Taariikh: 02/05/2013

**Magacaabid Taliyaha Ciidanka Booliska**

**MADAXWAYNAHA J.F.S**

| | |
|---|---|
| **Markuu Arkay:** | Qodobka 87, Xarfaha 'b' iyo 'c' iyo Faqradda 2aad ee Dastuurka J.F.S. |
| **Markuu Arkay:** | Qodobka 97aad, Faqradda 1aad ee Dastuurka J.F.S |
| **Markuu Arkay:** | Qodobka 100aad, Xarfihiisa 'a' iyo'd' ee Dastuurka J.F.S. |
| **Markuu Arkaay:** | Xeer Lr. 2 ee soo baxay 23/12/1972 kuna saabsan Dhismaha Ciidanka Booliska iyo Xeer Lr. 14 ee soo baxay 04/01/1973 kuna saabsan Nidaamka Ciidanka Booliska. |
| **Markuu Arkay:** | Soo jeedinta Ra'iisul Wasaaraha ee Warqadda Lr. XRW/MGC/00070/04/13 ee 02/05/2013, kuna saabsan go'aanka Golaha Wasiirrada Lr. SHG.00.26.13 ee ku saabsan Magacaabista Taliyaha Ciidanka Booliska. |
| **Markuu Tixgeliyay:** | Hawlkarnimada iyo hawsha waayo-aragnimada leh uu waqti dheer u leeyahay. |

**Wuxuu soo saaray Xeerkaan**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo markii ay taariikhdu tahay 02/05/2013 wuxuu Madaxweynaha oggolaaday soo jeedinta Golaha Wasiirada wuxuuna Xeerkaan ku magacaabay **S/Guuto Cabdikariim Daahir Saacid** inuu noqdo Taliyaha Ciidanka Booliska Soomaaliyeed.

**Qodobka 2aad**

Wuxuu Xeerkaan u Dhaqan-gelayaa si degdeg ah markii uu Madaxwaynaha saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

**MUQDISHO 02/05/2013**

**Magacaabid Garyaqaanka Guud**

**MADAXWAYNAHA J.F.S**

| | |
|---|---|
| **Markuu Arkay:** | Qodobka 87, Xarfaha 'b' iyo 'c' iyo Faqradda 2aad ee Dastuurka J.F.S. |
| **Markuu Arkay:** | Qodobka 97aad, Faqradda 1aad iyo Qodobka 100aad Xarfaha A iy D ee Dastuurka J.F.S |
| **Markuu Arkay:** | Soo jeedinta Golaha Wasiirada Lr. SHGW/00/25/4/13 ee 24/04/2013 kuna saabsan Magacaabista Garyaqaanka Guud ee Qaranka. |
| **Markuu Arkaay:** | Warqadda Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda J.F.S Lr. XRW/MGC/00040/04/13 ee 29/04/2013 kuna saabsan soo jeedinta Golaha Wasiirada kor ku xusan. |
| **Markuu Arkay:** | Aqoontiisa iyo waayo-aragnimadiisa u leeyahay dhinaca Qaanuunka |

**Wuxuu soo saaray Xeerkaan**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo manta oo ay taariikhdu tahay 11/06/2013 waxa uu Madaxweynaha oggolaaday soo jeedinta Golaha Wasiirada kuna saabsan magacaabista Garyaqaanka Guud ee Qaranka waxa uuna Xeerkaan ku magacaabay **Dr. Cusmaan Cilmi Guuleed** inuu noqdo Garyaqaanka Guud ee Qaranka.

**Qodobka 2aad**

Wuxuu Xeerkaan u Dhaqan-gelayaa si degdeg ah markii uu Madaxwaynaha saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

**MUQDISHO 11/06/2013**

**XEER MADAXWAYNAHA Lr. 73** Taariikh: 18/05/2013

**Magacaabidda Guddoomiye Ku-Xigeenka Labaad ee Maamulka iyo Maaliyadda Gobolka Hiiraan**

**MADAXWAYNAHA J.F.S**

**Markuu Arkay:** Qodobka 87, Xarfka 'c', Qodobka 90aad, Xarafka 'k' iyo 99aad, Xarafka 'g' Dastuurka J.F.S.

**Markuu Arkay:** Warqadda Lr. WAG & AQ/XW/209/13 Wasiirka Arrimaha Gudaha & Amniga Qaranka

**Markuu Arkay:** Xeer Madaxweyne Lr. 51 ee soo baxay 03/03/2013 kuna saabsan magacaabidda Guddiga Ku-meelgaarka ee Gobolka Hiiraan.

**Markuu Tixgeliyay:** Inay jirto in baahi loo qabo in la bilaabo dhisidda Maamul u samaynta Gobolada iyo Degmooyinka si looga sii ambaqaado mustaqbalka inay dhismaan Dowlad-goboleedyada

**Wuxuu soo saaray Xeerkaan**

**Qodobka 1aad**

Wuxuu Madaxweynaha laga bilaabo maanta oo ah 18/05/2013 u magacaabay **Md. Khaliif Cabdi Cumar** inuu noqdo Guddoomiye Ku-Xigeenka labaad Maamulka iyo Maaliyadda ee Gobolka Hiiraan.

**Qodobka 2aad**

Wuxuu Xeerkaan u Dhaqan-gelayaa si degdeg ah markii uu Madaxwaynaha saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya.

**MUQDISHO 18/05/2013**

**PRESIDENTIAL DECREE No. 74** DATE: 23/05/2013

**Appointment of a Petroleum & Mineral Resources Senior Advisor to the Presidency**

## THE PRESIDENT OF THE FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

| | |
|---|---|
| **After Considering:** | Article 90, Paragraph 11 of the Constitution of the Federal Republic of Somalia |
| **Having Seen:** | The Experience and the CV of the appointee |
| **After Recognizing:** | The need for appointing a Petroleum & Mineral Resources Senior Advisor to the Presidency. |

## DECREES THE FOLLOWING:

### Article 1

On the Date the President signs this Decree, **Dr. Abdullahi Hadier**, is appointed as the Petroleum & Mineral Resources Senior Advisor to the Presidency.

### Article 2

This decree takes effect on the day it is signed by the President of the Federal Republic of Somalia and will be published in the Official Bulletin of the Fedeeral Republic of Somalia.

MOGADISHO 23/05/2013

**XEER MADAXWAYNAHA Lr. 76** Taariikh: 11/06/2013

**Magacaabid Nootaayo**

**MADAXWAYNAHA J.F.S**

**Markuu Arkay:** Qodobka 87, Xarfaha 'b' iyo 'c' ee Dastuurka J.F.S.

**Markuu Arkay:** Xeerka Lr. 1 ee soo baxay 02/03/1962 kuna saabsan hawlaha Nootaayada

**Markuu Arkay:** Xeerka Lr. 7 ee soo baxay 02/02/1986 oo awood u siinaya Madaxweynaha magacaabidda Nootaayooyin

**Markuu Arkay:** Soo jeedinta Wasiirka Garsoorka Ref: Lr. WGADDDHF/XWE12-598/2012

**Markuu Tixgeliyay:** Baahida loo qabo in la magacaabo Hawlaha Nootaayada Dad aqoon u leh Shuruucda iyo Xeerarka Dalka.

**Wuxuu soo saaray Xeerkaan**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo manta oo ay taariikhdu tahay 11/06/2013, waxaa loo ogolaaday **Dr. Xasan Nuur Guuleed** inuu xafiis Nootaayo ku yeesho Muqdisho.

**Qodobka 2aad**

Wuxuu Xeerkaan u Dhaqan-gelayaa si degdeg ah markii uu Madaxwaynaha saxiixo waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

**MUQDISHO 11/06/2013**

**Madaxweynaha J. F. S.**
**Mudane Xasan Sheekh Maxamuud**

**XEER MADAXWAYNAHA Lr. 81** Taariikh: 22/06/2013

**Magacaabid Nootaayo**

**MADAXWAYNAHA J.S**

| | |
|---|---|
| **Markuu Arkay:** | Qodobka 87, Faqraddiisa 1, Xarafka 'c' iyo Faqraddiisa 2aad ee Dastuurka J.F.S. |
| **Markuu Arkay:** | Sharciga Lr. 8 ee 15/02/1961 |
| **Markuu Arkay:** | Xeer nidaamiyaha ku saabsan Nootaayada Lr.1 ee soo baxay 1/3/1962 |
| **Markuu Arkay:** | Qodobka 2aad ee Sharciga Lr. 7 ee 2/2/1986 kuna saabsan awood u siinta Madaxweynaha inuu si toos ah u magacaabo Nootaayo qofkii mudan |
| **Markuu Tixgeliyay:** | Soo jeedinta Wasiirka Garsoorka, Arrimaha Diinta, Dib-u-heshiisiinta iyo Federaalka Ref: WGADDDHF /XW/E-12/311/2013, taariikh: 6/4/2013. |

**Wuxuu soo saaray Xeerkaan**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo manta oo ay taariikhdu tahay 22/06/2013, waxaa loo ogolaaday **Dr. Axmed Cabdi Xaashi** inuu furto Nootaayo.

**Qodobka 2aad**

Waxa uu Xafiiska **Dr. Axmed Cabdi Xaashi** ka hawlgelayaa Muqdisho ee Gobolka Benaadir iyo Gobollada Deriska la leh.

**Qodobka 3aad**

Wuxuu Xeerkaan u Dhaqan-gelayaa si degdeg ah markii uu Madaxwaynaha saxiixo waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

**MUQDISHO 22/06/2013**

**Madaxweynaha J. F. S.**
**Mudane Xasan Sheekh Maxamuud**

**XEER MADAXWAYNAHA Lr. 82** Taariikh: 22/06/2013

**Magacaabid Nootaayo**

**MADAXWAYNAHA J.S**

**Markuu Arkay:** Qodobka 87, Faqraddiisa 1, Xarafka 'c' iyo Faqraddiisa 2aad ee Dastuurka J.F.S.

**Markuu Arkay:** Sharciga Lr. 8 ee 15/02/1961

**Markuu Arkay:** Xeer nidaamiyaha ku saabsan Nootaayada Lr.1 ee soo baxay 1/3/1962

**Markuu Arkay:** Qodobka 2aad ee Sharciga Lr. 7 ee 2/2/1986 kuna saabsan awood u siinta Madaxweynaha inuu si toos ah u magacaabo Nootaayo qofkii mudan

**Markuu Tixgeliyay:** Soo jeedinta Wasiirka Garsoorka, Arrimaha Diinta, Dib-u-heshiisiinta iyo Federaalka Ref: WGADDDHF /XW/F-12/51/2013, taariikh: 20/1/2013.

**Wuxuu soo saaray Xeerkaan**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo manta oo ay taariikhdu tahay 22/06/2013, waxaa loo ogolaaday **Dr. Cismaan Maxamed Ismaaciil** inuu furto Nootaayo.

**Qodobka 2aad**

Waxa uu Xafiiska **Dr. Cismaan Maxamed Ismaaciil** ka hawlgelayaa Magaalada Muqdisho ee Gobolka Benaadir.

**Qodobka 3aad**

Wuxuu Xeerkaan u Dhaqan-gelayaa si degdeg ah markii uu Madaxwaynaha saxiixo waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

**MUQDISHO 22/06/2013**

**Madaxweynaha J. F. S.**
**Xasan Sheekh Maxamuud**

**PRESIDENTIAL DECREE No. 83** DATE: 30/06/2013

**Appointment of a Regional Affairs Advisor for the Presidency**

**THE PRESIDENT OF THE FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA**

| | |
|---|---|
| **After Considering:** | Article 90, Paragraph 11 of the Constitution of the Federal Republic of Somalia |
| **Having Seen:** | The Experience and the CV of the appointee |
| **After Recognizing:** | The need for appointing a Regional Affairs Advisor for the Presidency. |

**DECREES THE FOLLOWING:**

**Article 1**

On the Date the President signs this Decree, **Mr. Abdi Da'ud**, is appointed as a Regional Affairs Advisor for the Presidency.

**Article 2**

This Decree takes effect on the day it is signed by the President of the Federal Republic of Somalia and will be published in the Official Bulletin of the Fedeeral Republic of Somalia.

**MOGADISHO 30/06/2013**

**XEER MADAXWAYNAHA Lr. 84** Taariikh: 13/07/2013

**Ku soo Wareejin Sarkaal Ciidamada Asluubta**

**MADAXWAYNAHA J. F. S**

**Markuu arkay:** Qodobka 87, Faqraddiisa 1, Xarafka 'C' iyo Faqraddiisa 2aad ee Dastuurka J.F.S

**Markuu arkay:** Qodobka 90aad, Xarafka 'B' ee Dastuurka J.F.S.

**Markuu Arkay:** Soo jeedinta Taliyaha Ciidanka Asluubta ee ku xusan Warqadda X/T/CAS/99/2013 ee 15/05/2013 kuna saabsan G/sare Cali Maxamed Barre

**Markuu Tixgeliyay:** Inuu Sarkaalkaasi ka soo wareegay Ciidanka Xoogga 2007 una soo wareegay Ciidanka Asluubta.

**Wuxuu soo saaray Xeerkaan**

**Qodobka 1aad**

Laga bilaabo 2007, waxaa uu **G/Sare Cali Maxamed Barre** ka tirsan yahay Ciidanka Asluubta.

**Qodobka 2aad**

Wuxuu Xeerkaan xaq u siinayaa Sarkaalka kor ku xusan wixii mushahar iyo gunno ee ka maqan la siiyo loona fududeeyo iyada oo la waafajinaayo Xeerarka Shuruucda Ciidamada Qalabka Sida ee Dalka.

**Qodobka 3aad**

Wuxuu Xeerkaan u dhaqangelayaa si degdeg ah markii uu Madaxweynaha saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

**MUQDISHO 13/07/2013**

**XEER MADAXWAYNAHA Lr. 85** Taariikh: 13/07/2013

**Magacaabid Nootaayo**

**MADAXWAYNAHA J.F.S**

**Markuu Arkay:** Qodobka 87, Faqraddiisa 1, Xarafka 'c' iyo Faqraddiisa 2aad ee Dastuurka J.F.S.

**Markuu Arkay:** Sharciga Lr. 8 ee 15/02/1961

**Markuu Arkay:** Xeer nidaamiyaha ku saabsan Nootaayada Lr.1 ee soo baxay 1/3/1962

**Markuu Arkay:** Qodobka 2aad ee Sharciga Lr. 7 ee 2/2/1986 kuna saabsan awood u siinta Madaxweynaha inuu si toos ah u magacaabo Nootaayo qofkii mudan

**Markuu Tixgeliyay:** Soo jeedinta Wasiirka Garsoorka, Arrimaha Diinta, Dib-u-heshiisiinta iyo Federaalka Ref: WGADDDHF /XW/E-12/0052/2013, taariikh: 20/1/2013.

**Wuxuu soo saaray Xeerkaan**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo manta oo ay taariikhdu tahay 22/06/2013, waxaa loo ogolaaday **Dr. Ismaaciil Maxamed Cabdullaahi** inuu furto Nootaayo.

**Qodobka 2aad**

Waxa uu Xafiiska **Dr. Ismaaciil Maxamed Cabdullaahi** ka hawlgelayaa Magaalada Muqdisho ee Gobolka Benaadir.

**Qodobka 3aad**

Wuxuu Xeerkaan u Dhaqan-gelayaa si degdeg ah markii uu Madaxwaynaha saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

**MUQDISHO 13/07/2013**

**Madaxweynaha J. F. S.**

**Xasan Sheekh Maxamuud**

**XEER MADAXWAYNAHA Lr. 86** Taariikh: 13/07/2013

**Magacaabid Nootaayo**

**MADAXWAYNAHA J.F.S**

**Markuu Arkay:** Qodobka 87, Faqraddiisa 1, Xarafka 'c' iyo Faqraddiisa 2aad ee Dastuurka J.F.S.

**Markuu Arkay:** Sharciga Lr. 8 ee 15/02/1961

**Markuu Arkay:** Xeer nidaamiyaha ku saabsan Nootaayada Lr.1 ee soo baxay 1/3/1962

**Markuu Arkay:** Qodobka 2aad ee Sharciga Lr. 7 ee 2/2/1986 kuna saabsan awood u siinta Madaxweynaha inuu si toos ah u magacaabo Nootaayo qofkii mudan

**Markuu Tixgeliyay:** Soo jeedinta Wasiirka Garsoorka, Arrimaha Diinta, Dib-u-heshiisiinta iyo Federaalka Ref: WGADDDHF /XW/E-12/409/2013, taariikh: 05/06/2013.

**Wuxuu soo saaray Xeerkaan**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo manta oo ay taariikhdu tahay 22/06/2013, waxaa loo ogolaaday **Dr. Cabdullaahi Faarax Qaarey** inuu furto Nootaayo.

**Qodobka 2aad**

Waxa uu Xafiiska **Dr. Cabdullaahi Faarax Qaarey** ka hawlgelayaa Magaalada Muqdisho ee Gobolka Benaadir.

**Qodobka 3aad**

Wuxuu Xeerkaan u Dhaqan-gelayaa si degdeg ah markii uu Madaxwaynaha saxiixo waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

**MUQDISHO 13/07/2013**

**Madaxweynaha J. F. S.**
**Mudane Xasan Sheekh Maxamuud**

**PRESIDENTIAL DECREE No. 88** DATE: 19/07/2013

**Appointment of a Strategic and Special Assignments Advisor to the Presidency**

## THE PRESIDENT OF THE FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

| | |
|---|---|
| **After Considering:** | Article 90, Paragraph 11 of the Constitution of the Federal Republic of Somalia |
| **Having Seen:** | The Experience and the CV of the appointee |
| **After Recognizing:** | The need for appointing a Stretegic and Special Assignments Advisor to the Presidency. |

## DECREES THE FOLLOWING:

### Article 1

On the Date the President signs this Decree, **Mr. Mohamed Mohamud Ali "Capt. Well"**, is appointed as a Stretegic and Special Assigments Advisor to the Presidency.

### Article 2

This Decree takes effect on the day it is signed by the President of the Federal Republic of Somalia and will be published in the Official Bulletin of the Fedeeral Republic of Somalia.

MOGADISHO 19/07/2013

**XEER MADAXWAYNAHA Lr. 98** Taariikh: 29/07/2013

**Magacaabid Taliyaha Ciidanka Asluubta Soomaaliyeed**

**MADAXWAYNAHA J.S**

| | |
|---|---|
| **Markuu Arkay:** | Qodobka 90aad, Xarfaha 'b' iyo 'k' ee Dastuurka J.F.S |
| **Markuu Arkay:** | Qodobka 87aad, Xarfaha 'b' iyo 'c' iyo Faqradda 2aad ee Dastuurka J.F.S |
| **Markuu Arkay:** | Qodobka 97aad, Faqradda 1aad ee Dastuurka J.F.S |
| **Markuu Arkay:** | Qodobka 100aad, Xarfihiisa 'a' iyo 'd' ee Dastuurka J.F.S. |
| **Markuu Arkaay:** | Go'aanka Golaha Wasiirrada iyo soo jeedinta Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya Ref: XRW/XW/00393/07/13 taariikh: 18/07/2013. |
| **Markuu Tixgeliyay:** | Baahida loo qabo in la buuxiyo jagada Taliyaha Ciidanka Asluubta Soomaaliyeed. |

**Wuxuu soo saaray Xeerkaan**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo manta oo ay taariikhdu tahay 29/7/2013 waxaa uu Madaxweynuhu u magacaabay **Gen. Xuseen Xasan Cusmaan** inuu noqdo Taliyaha Ciidanka Asluubta Soomaaliyeed.

**Qodobka 2aad**

Wuxuu Xeerkaan u Dhaqan-gelayaa si degdeg ah markii uu Madaxwaynaha saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

**MUQDISHO 29/07/2013**

**XEER MADAXWAYNAHA Lr. 102** Taariikh: 30/07/2013

**Magacaabid Guddoomiyaha Hey'adda Dib-u-Soo Celinta & Dib-u-Dejinta Qaxootiga iyo Barakacayaasha Qaranka**

**MADAXWAYNAHA J.F.S**

| | |
|---|---|
| **Markuu Arkay:** | Qodobka 90aad, Xarafka 'k' ee Dastuurka J.F.S |
| **Markuu Arkay:** | Qodobka 97aad, Faqradda 1aad ee Dastuurka J.F.S |
| **Markuu Arkay:** | Qodobka 100aad Xarfihiisa 'a' & 'd' ee Dastuurka J.F.S |
| **Markuu Arkay:** | Qodobka 87aad, Faqradda 2aad ee Dastuurka J.F.S |
| **Markuu Arkaay:** | Go'aanka Golaha Wasiirrada iyo soo jeedinta Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya Ref: XRW/MGC/00072/07/13 taariikh: 28/07/2013. |
| **Markuu Tixgeliyay:** | Baahida loo qabo in la magacaabo Guddoomiyaha Hey'adda Dib-u-soo Celinta & Dib-u-Dejinta Qaxootiga iyo Barakacayaasha Qaranka. |

**Wuxuu soo saaray Xeerkaan**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 30/7/2013 waxaa uu Madaxweynuhu u magacaabay **Mudane Axmed Cabdikariin Nuur (Ahmed-Daahir)** inuu noqdo Guddoomiyaha Hey'adda Dib-u-soo Celinta & Dib-u-Dejinta Qaxootiga iyo Barakacayaasha Qaranka.

**Qodobka 2aad**

Waxa uu Xeerkaan Dhaqan-gelayaa marka uu Madaxwaynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee J.F.S.

**MUQDISHO 30/07/2013**

**MADAXWAYNAHA J. F. S**

**Markuu Arkay:** Qodobka 87, Xarafka 'C' iyo Qodobka 90, Xarafka 'B' ee Dastuurka Federaalka KMG

**Markuu Arkay:** Sharciga Lr. 15 ee soo baxay 06/04/1960 kuna saabsan Dhismaha Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed.

**Markuu Arkay:** Soo jeedinta Taliyaha Ciidanka Xoogga Dalka Somaaliyed 06/08/2013

**Waxa uu soo saaray Xeerkaan**

**Qodobka 1aad**

Laga bilaabo maalinta uu Madaxweynuhu saxiixo Xeerkaan, waxaa loo dallacsiiyay **G/le Sare Xasan Cali Qeylow** darajada Sarreeye Guuto, waxaana loo magacaabay inuu noqdo Abbaanduulaha Qeybta 12ka Abriil ee Xoogga Dalka Soomaaliyeed.

**Qodobka 2aad**

Wuxu Xeerkaan u dhaqangelayaa si degdeg ah markii uu Madaxweynaha saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

**MUQDISHO 07/08/2013**

**XEER MADAXWAYNAHA Lr. 116** Taariikh: 06/08/2013

Oggolaanshaha Sharciga Degmooyinka
Iyo Gobolada Dalka.

## MADAXWAYNAHA J. F. S

| | |
|---|---|
| **Markuu arkay:** | Qodobka 87, Xarfaha , b , iyo 'c , iyo Farqadda 2aad ee Dastuurka J.F.S. |
| **Markuu arkay:** | Qodobka 97aad, Faqradda 1aad iyo Qodobka 100aad Xarfaha A iyo D ee Dastuurka J.F.S |
| **Markuu arkay:** | Warqadda Lr. 616-XG-08-13 ee 06/08/2013 kuna saabsan Ansaxinta Golaha Shacabka ee Sharciga Maamulidda Degmooyinka Iyo Gobollada |
| **Markuu Tixgeliyay:** | Baahida loo qabo in la baahiyo lana furfuro hab-maamulka Degmooyinka iyo Gobolada si loogu gudbo habka Federaalnimada ee Dalka. |
| Markuu Tixgeliyay: | Baahida loo qabo in la baahiyo lana furfuro hab-maamulka Degmooyinka Iyo Gobolada si loogu gudbo habka Federaalnimada ee Dalka. |

Wuxuu soo saaray Xeerkaan

### Qodobka 1aad

Laga bilaabo markii ay taariikhdu tahay 05/08/2013 wuxuu Madaxwaynaha oggolaaday Ansaxinta Golaha Shacabka ee ku saabsan Sharciga Maamulidda Degmooyinka iyo Gobolada.

### Qodobka 2aad

Waxaa ku lifaaqan Xeerkaan Madaxwayne Sharciga Maamulidda Degmoyinka iyo Gobolada Dalka.

### Qodobka 3aad

Wuxuu Xeerkaan dhaqan-gelayaa isla markuu saxiixo Madaxwaynaha J.F.S waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya.

**MUQDISHO 06/08/2013**

XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
WAALA DIWAAN GELIYAY
DIWAAN NO. HA/DEK/2013
TAARIIKH 6/11/2013
SAXIIXA NO

Madaxwaynaha
Mudane Xasan Sheekh Maxamuud

Republic of Somalia
Office of the President

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
GOLAHASHACABKA

# SHARCIGA MAAMULLADA DEGMOOYINKA IYO GOBOLLADA DALKA

Taariikhda la-Ansixiyay
24 Luulyo 2013

Federal Republic of Somalia
Federal Parliament
Committee of Interior Affairs, Regional Administration & National Security

جمهورية الصومال الفيدرالية
البرلمان الصومالي
لجنة الشؤون الداخلية ، إدارة الأقاليم والأمن القومي

# JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
# BAARLAMAANKA FEDERAALKA

Guddiga Arrimaha Gudaha, Maamullada Gobollada & Amniga Qaranka

## GOGOLDHIG

Muhiimadda iyo ujeeddooyinka Golaha Shacbiga Inogu igmaday in dib-u-eegis lagu sameeyo Dastuurka Federaalka Soomaaliya oo si ku meel gaar ah loo ansixiyey 1st Ogoosto 2012, waxaa ka mid ah in la dhiso Dawlad-Goboleedyo xubin ka noqda Dawladda Federaalka Soomaaliya sida ku cad Qod:48aad faq: 2aad ee Dastuurka Federalka kmg:

Sidaas daraadeed ujeeddada sharcigan looga golleeyahay waa in la dejiyo axkaamta dalka looga dhisi lahaa golayaasha maamulka degmooyinka iyo gobollada, ujeeddada gaarka ah oo laga leeyahayna waa:-

A: In la dhiso Goleyaal Maamulleed oo heer Goboll iyo Degmooyinba leh oo ka Mas 'uul noqda adeegyada ay u baahan yihiin muwaaddiniinta deggan Gobollada iyo degmooyinka iyo fulinta Maamul-wanaagga Dawladda.

B: In ay fududeeyaan suurto gelinta dhismaha Dawlad Gobolleedyo xubin ka noqon doona Dawlladda Federaalka Soomaaliya sida ku cad Qod: 48aad iyo 49aad ee Dastuurka Federalka KMG:

Federal Republic of Somalia
Federal Parliament
Committee of Interior Affairs, Regional Administration & National Security

جمهورية الصومال الفيدرالية
البرلمان الصومالي
لجنة الشؤون الداخلية ، إدارة الأقاليم والأمن القومي

# JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
# BAARLAMAANKA FEDERAALKA

## Guddiga Arrimaha Gudaha, Maamullada Gobollada & Amniga Qaranka

Xubnaha Guddiga uu ka kooban yahay

| No | Title | Magacyada Xubnaha Guddiga | Xil |
|---|---|---|---|
| 1. | Hon. | Foosiya Maxamed Shiikh | Guddoomiye |
| 2. | Hon. | Daahir Amiin Jeesow | Gud. Ku Xigeen |
| 3. | Hon. | Maxamed Axmed Gurxan | Xog-haye |
| 4. | Hon. | Cabdirishid Maxamed Xiddig | Gud. Gudi Hoosaadka Dhismaha Maamulka |
| 5. | Hon. | Axmed Cismaaciil Maxamed | Gud. Gudi Hoosaadka Amniga |
| 6. | Hon. | Abdinasir Garane Maxamed | Xubin |
| 7. | Hon. | Aadan Mohamed Nor Saransor | Xubin |
| 8. | Hon. | Sh. Adan Mohamed Nor | Xubin |
| 9. | Hon. | Ali Aden Hussein | Xubin |
| 10. | Hon. | Mohamed Omar Eymoy | Xubin |
| 11. | Hon. | Abdiweli Ibraahim Sh. Mudey | Xubin |
| 12. | Hon. | Abdullahi Yusuf Hassan (Alankey) | Xubin |
| 13. | Hon. | Mohamed Abdullahi Hassan (Fadhaye) | Xubin |
| 14. | Hon. | Omar Mohamud Mohamed | Xubin |
| 15. | Hon. | Mohamed Abdullahi Farah | Xubin |
| 16. | Hon. | Abdulkadir Ali Omar | Xubin |
| 17. | Hon. | Seynab Mohamed Amir | Xubin |
| 18. | Hon. | Abdixakim Cige Guled | Xubin |

TUSMO

Qodobka 1aad: Tilmaamaha iyo Eray-bixinta: ............................................
Qodobka 2aad: Mabaadii' da Guud ..........................................................
Qodobka 3aad: Shuruudaha Degmooyinka Cusub lagu dhisi doono: ............
Qodobka 4aad: Shuruudaha Gobolada Cusub lagu dhisi doono: .................
Qodobka 5aad: Degmooyinka iyo gobolada: ..............................................
Qodobka 6aad: Shirweeynaha ..................................................................
Qodobka 7aad: Doorashada Guddoomiyaha Degmada ahna Duqa Magaalada, Ku xigeennadiisa iyo Muddada Xilka ay heynayaan ....................
Qodobka 8aad: Xulka Xubnaha Golaha Gobolka ...........................................
Qodobka 9aad: Doorashada Guddoomiyaha Gobolka iyo Ku xigeenadiisa.....
Qodobka 10aad: Shuruudaha Xubinnamada Goleyaasha Degmooyinka iyo Gobollada.......................................................................................
Qodobka 11aad: Xilwaayidda Xubinimada Golaha Degmada iyo kan Gobolka
Qodobka 12aad: Dhaarta ........................................................................
Qodobka 13aad: Xasanaad ......................................................................
Qodobka 14: Guddiga Maamulka Degmada Xubnaha Guddiga Maamulka Degmadu waxay ka kooban yahiin 14 xubnood.............................................
Qodobka 15aad: Waajibaadka Guddiga Maamulka Degmada.........................
Qodobka 16aad: Guddiga Nabadgelyada Degmada ........................................
Qodobka 17aad: Mas'uliyadda Guddomiyaha Degmada ahna Duqa Magaalada
Qodobka 18aad: Xog-hayeyaasha Dowladaha Hoose ......................................
Qodobka19aad: Waajibaadka Xoghayaha Dowladda Hoose ee Degmada......
Qodobka 20 aad: Waajibaadka ku xigeenada Guddoomiyaha Degamada ahna Duqa Magaalada...........................................................................
Qodobka21 aad : Xubnaha Golaha Gobolka..................................................
Qodobka 22aad: Waajibaadka Xubnaha Golaha Gobolka ..............................
Qodobka 23aad: Waajibaadka Guddoomiyaha Maamulka Gobolka...............
Qodobka 24aad: Waajibaadka Ku xigeennada Guddoomiyaha Gobolka .......

Qodobka 25aad: Xilalka Xog-hayeyaasha Gobolka.........................................
Qodobka 26aad: Guddiga Nabadgelyada Gobolka.........................................

Qodobka 27aad: Waajibaadka Guddiga Nabadgelyada Gobolka....................
Qodobka 28aad:Kormerka iyo baarista Miisaaniyadda ee Hantidhowrka Gobolada
Qodobka 29aad: Hantida Dowladda Hoose .................................................
Qodobka 30aad: Miisaaniyadda ..........................................................................
Qodobka 31aad: Dakhliga Dowladda Hoose ..........................................................
Qodobka 32aad: Habka Canshuur Saaridda ..........................................................
Qodobka 33aad: Ururinta Dakhliga .........................................................................
Qodobka 34aad: Kharajka ...................................................................................
Qodobka 35aad: Habka Xisaabaadka .......................................................................
Qodobka 36aad: Mas'uuliyad Xisaabeed .................................................................
Qodobka 37aad: Gunnooyinka, Mushaarooyinka Madaxda, Shaqaalaha
Degmooyinka & Gobollada.....................................................................................
Qodobka 38aad: Maxkamadaha .............................................................................
Qodobka 39aad: Xeer Ilaalinta Gobolka ..............................................................
Qodobka 40aad: Dhismaha iyo Waajibaadka Ciidanka Booliska, Asluubta
iyo Nabadsugidda Degmooyinka iyo Gobollada.....................................................
Qodobka 41aad: Xubintiisa bannaysa Xilka Xubinnimada Golayaasha
Degmooyinka iyo Gobollada.....................................................................................
Qodobka 42aad: Fadhiyada Golayaasha Degmooyinka iyo Gobollada..........
Qodobka 43aad: Faragelinta Dawladda Federalka ah ee Xalinta khilaafadka
Maamullada Degmooyinka, Gobollada, iyo Dowlad Goboleedyada..............
Qodobka 44aad: Baabi'in .........................................................................................
Qodobka 45aad: Dhaqangal .....................................................................................

## Qodobka 1aad: Tilmaamaha iyo Eray-bixinta

Marka sharcigan la raacayo Erayada soo socda waxay leeyihiin micnaha mid waliba ku hor qoran:

1. Xeer: Waxa loola jeedaa hab nidamiya Maamulka laamaha Hay'adaha Dowladda ee heer Dowlad Goboleed, heer Gobol iyo heer Degmo laguna oggolaaday si sharciga waafaqsan.
2. Guddiga Maamulka: waxa loola jeedaa Hay'adaha ugu sarreysa Maamulka heer Degmo iyo heer Gobol.
3. Guddoomiye: waxaa loola jeedaa Madaxa ugu sarreeya Maamulka Degmada ama Gobolka.
4. Xog-haye Gobol: Waxaa loola jeedaa Mas'uulka maamula laamaha Hay'adaha Fulinta ee heer Gobol.
5. Xog-haye Dowladda Hoose: waxaa loola jeedaa Maamulaha fulinta laamaha Dowladda Hoose
6. Xog-haye Degmo: waxaa loola jeedaa Mas'uulka maamula Xafiis ka mid ah laamaha fulinta heer Degmo.
7. Duqa Magaalada: waxa loola jeeda madaxa maamulka dowladda Hoose
8. Beel: waxa loola jeedaa qeyb Bulsho oo wax ka degta deeganka Degmada
9. Degmo: waxa loola jeedaa deegaan leh soohdimo cayiman kana kooban tuulooyin hoos timaadana Maamul Gobol.
10. Gobol: waxa loola jeedaa qeyb ka mid ah Jamhuriyadda Federalka Somaliya
11. Dowlad Goboleed: Waxa loola jeedaa Maamulka qayb ka mid ah Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliyeed oo ka kooban ugu yaraan laba Gobol sida ku cad Qodobka 49 Faqrada 6aad ee Dastuurka Federaalka KMG.
12. Darajada A- waxaa loola jeedaa Caasimadda Dalka ee Muqdisho
13. Darajada B- waxa loola jeedaa degmada ah magaala madaxda Gobolka
14. Darajada C- waxa loola jeedaa Degmooyinka kale oo aanay ku jirin Degmada Magaalo madaxda Gobolka.
15. Golaha Degmada – waxa loola jeedaa Hay'adaha Xeer Dejinta Degmada ee Xubnihiisa la soo xulay.
16. Golaha Gobolka – waxaa loola jeedaa Hay'adda Xeer Dejinta Gobolka ee Xubnihiisa laga soo xulay Degmooyinka Gobolka.

## Qodobka 2aad; Mabaadii'da Guud

1. Mabaadii'da Islaamka iyo Dastuurka Federaalka KMG ah ayaa saldhig u ah sharci dejinta Degmooyinka, Gobollada iyo Dowlad Goboleedyada Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

2. Dowlad Goboleed waxaa noqon kara laba Gobol iyo wixii ka badan sida ku cad Qodobka 49aad Faqrada 5aad iyo 6aad ee Dastuurka Federalka KMG.
3. Nidaamka Maamullada Degmooyinka, Gobollada iyo Dowlad Gobolleedyada Jamhuuriyadda Federalka Soomaaliyeed waa KMG inta dalka laga dhaqangelinaayo Dastuurka Federaalka ah.
4. Dowlad Gobolleedyada dalku waxay yeelanayaan calan iyo astaan u gaar ah iyagoo ku soo saari doono Xeer-hoosaad laga diiwaan gelin doono Hay'adaha Dowlada Federalka ee ay quseeyso.
5. Maamulllada Dawladaha Hoose ee Jamhuuriydada Federalka Soomaaliya waa hay' ad qaran oo leh shaqsiyad sharciyadeed iyo maamul oo madax bannaan si ay u gutaan awooddooda maamul iyo sharciyadeed waxayna kala leeyihiin darajooyinkan:
   A. Maamulka Dowlada Hoose ee Muqdisho Darajada (A)
   B. Maamullada Dowladaha Hoose ee Heer Gobol (B)
   C. Maamullada Dowladaha Hoose ee Heer Degmo (C)
   D. Maamullada dowladaha hoose ee heer Tuulo (Delegato) Darajada (D)

**Qodobka 3aad: Shuruudaha Degmooyinka Cusub lagu dhisi doono:**

1. Degmo waa deegaan leh Soohdimo cayiman.
2. Ka kooban ugu yaraan 5 Tuulo. Tuuladu waa inay leedahay shuruudahan: waa inay ku nool yihiin ugu yaraan 10,000 ruux, waa inay leedahay Dugsi Hoose, Dugsi Quraan, Rug Boolis, Xafiis Dowlada Hoose iyo Xarun Caafimaad, soona saaran kara 14% Dakhliga guud ee Degmada.
3. Tirada dadka degen Degmada waa inay yihiin ugu yaraan 50,000 ruux.
4. Waa inay soo saaran karto dhaqaalaheeda ugu yaraan 70%.
5. Masaafada u dhaxeysa lab ada degmo waa inaysan ka yaraan 40km.

**Qodobka 4aad: Shuruudaha Gobolada Cusub lagu dhisi doono:**

1. Waa inuu leeyahay Soohdimo cayiman.
2. Ka kooban ugu yaraan 4 degmo.
3. Soo saaran kara 70% miisaaniyadooda.
4. Tirada dadka degan aysan ka yareyn 200,000 ruux.
5. Cabirka deegaanka Gobolku waa inuusan ka yareyn 400km2

**Qodobka Saad: Degmooyinka iyo gobolada:**

Degmooyinka dalku waa kuwii uu lahaa Gobol kasta taariikhdu markay ahayd 31/12/1990.

2. Gobollada dalka Soomaaliyeed waxay ka kooban yihiin 18 gobol.
3. Magaala Madaxyada Gobolladu waa kuwii j iray taariikdu markay ahayd 31/12/1990.
4. Caasimadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa magaalada Muqdisho sida ku cad qodobka 9aad ee dastuurka KMG ah ee

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. Caasimadda Dalku waxa ay yeelanaysaa sharci u gaar ah.

**Qodobka 6aad: Shirweeynaha**

1. Abaabulka, Qabashada Shirweynaha iyo fidinta gogasha lagu dhisaayo Maamullada Degmooyinka, Gobollada iyo Dowlad Gobolleedyada waxaa masuuliyadeeda leh:
   - A. Odayaasha Dhaqanka ee Deegaanka oo kaashanaya Xildhibaanada Qaranka ee ka soo jeeda Deegaankas, Maamulada ka jira Deegaankaas iyo Qeybaha kala duwan ee Bulshada.
   - B. Odayaasha Dhaqanka ee Deegaanka waxay xalinayaan wixii qilaaafaad ah ee Beelaha ka dhex jira si loo gaaro dib u heshiisiin rasmi ah.
   - C. Odoyaasha Dhaqanku Waxay soo xulayaan xubnaha ergooyinka iyagoo la tashanaya Xildhibaanada Qaranka ee ka soo jeeda Deegaanka.
2. Xukuumada (Wasaarada Arrimaha Gudaha & Amniga Qaranka) waxay u xilsaaran tahay:
   - A. Sugida Amniga
   - B. Qiimeynta, Diyaarinta iyo Bixinta kharashka Shir weynaha.
   - C. Hubinta Habsami u socodka shirweynaha.
3. Guddiga Arrimaha Gudaha, Maamul Dhisida iyo Amniga Qaranka ee Baarlamaanka waxay kormeerayaan goobjoogna ka ahaanayaan xulitaanka ergooyinka iyo habraaca doorashooyinka Waxayna xaqiijinayaan Arrimaha Farsamada ee Shirweynaha.
4. Marka shirweynuhu yahay heer degmo, ergooyinkiisu waxay ka kala imaanayaan dhammaan beelaha tuulooyinka degmadaas degan.
5. Tirada ergooyinka shirweynaha Degmada Darajada "B" waa 150 xubnood, waana inay noqdaan 25% Haween.
6. Tirada ergooyinka shirweynaha Degmooyinka Darajada "C" waa 100 xubnod, waana in ay noqdaan 15% Haween.
7. Darajada (A) ee Caasimadda Dalka Shirweynaheeda iyo Ergadeeda waxaa cadeyn doona Xeerka gaarka ah ee Caasimadda.
8. Xulidda tirada xubnaha Golaha Degmadu waxay ku salaysan tahay darajada Degmada sida: B-27, C-21 xubnood.
9. Shirweynaha waxa uu iska dhex dooranayaa Guddoomiye iyo laba kuxigeen, Xoghayn & afhayeen oo hogaamiya habsami u socodka shirka.
10. Kadib Markii Baarlamaanka Federaalka uu Ansaxiyo Sharcigaan waa in lagu dhameystiraa dhismaha Maamullada Degmooyinka iyo gobollada dalka Muddo Saddax Bilood Gudahood ah, Hadii ay timaado Xaalado maangal ah oo mudada kor ku xusan lagu dhisi waayo Baarlamaanku wuxuu sameyn karaa mudo kordhin aan ka badneyn laba bilood waxaana baarlamaanka u soo gudbinaya Gudiga Arrimaha Gudaha, Amniga iyo Maamuldhisida.
11. Xil qabashadu waa Awood Qeybsi Beeleed iyadoo aan laga tageynin

Aqoonta iyo Waayo-aragnimada Xilqabtaha:

**Qodobka 7aad: Doorashada Guddoomiyaha Degmada ahna Duqa Magaalada, Ku xigeennadiisa iyo Muddada Xilka ay heynayaan.**

1. Codka doorashada Guddoomiyaha Degmada ahna Duqa Magaalada iyo ku xigeenadiisa wuxuu noqonayaa qarsoodi, wareegga 1aad waxaa lagu kala baxayaa 2/3 tirada xubnaha Golaha ee codka bixisay, Hadii wareega 1aad saddex musharax soo baxdo saddexdooda ayaa mar labaad loo codeynayaa, labada isku soo harta waxay ku kala baxayaan cod hal dheeri (50%+ 1) tirada codka bixisay.

2. Muddada ay xilka haynayaan waa labo (2) sana hadii aysan imaan shuruudaha ku xusan Qodobka 9aad farqadiisa 1aad ilaa 5aad ee sharcigan.

**Qodobka 8aad: Xulka Xubnaha Golaha Gobolka**

1. Degmo kasta waxay iska soo xuleysaa affar xubnood oo uu ka mid yahay Guddoomiyaha Degmada.
2. Waxayna tegayaan Magaala madaxda Gobolka iyagoo matalaya degmooyinkooda. Si ay uga mid noqdaan Golaha Gobolka markii laga reebo Guddoomiyaha Degmada oo isagu dib ugu noqonaayo degmadiisa.

**Qodobka 9aad: Doorashada Guddoomiyaha Gobolka iyo Ku xigeenadiisa**

1. Xubnaha Golaha Gobolku waxay iska dhex xulayaan Shir guddoomiye, ku xigeen iyo xoghaye oo ka reeban tartanka doorashada Guddoomiyaha Gobolka iyo ku xigeenadiisa. Musharaxiinta u tartamaaya xilalka Guddoomiyaha Gobolka iyo ku xigeenadiisa waxay arji qoraal ah oo ay ku caddeynayaan xilalka ay u tartamayaan u soo gudbinayaan Shirguddoonka doorashada ugu dambayn afartan iyo siddeed (48) saac ka hor maalinta doorashada la qabanayo.
2. Doorashada Guddoomiyaha Gobolka iyo Kuxigeenadiisa waxa ay u dhacaysaa habkii lagu soo doortay Guddommiyaasha Degmooyinka iyo Kuxigeenadooda sida ku cad Qodobka 5aad Faqrooyinkiisa 1aad iyo 2aad ee sharcigan.
3. Golayaasha Gobollada iyo kuwa Degmooyinka loo soo doortay waxay soo jeedinayaan.
   A. Guddoomiyeyasha Maxkamadaha Heer Gobol iyo Heer Degmo.
   B. Taliyeyaasha Booliiska Heer Gobol iyo Heer Degmo.

C. Taliyeyaasha Ciidanka Asluubta ee Heer Gobol iyo Heer Degmo.
D. Taliyeyaasha Ciidanka Nabadsugida Heer Gobol iyo Heer Degmo.
E. Xeer Ilaaliyeyaasha Heer Gobol iyo Heer Degmo.

Waxayna magacyadooda u gudbinayaan hay' adaha qaranka ee ay sida tooska ah u khuseyso si loogu soo magacaabo si sharciga waafaqsan iyadoo la dhowrayo aqoonta iyo waaya-aragnimada looga baahan yahay xilalka ay qaban doonaan, ayadoo la raacaayo soo jeedinta Maamullada heer Gobol iyo heer Degmo.

## Qodobka 10aad: Shuruudaha Xubinnamada Goleyaasha Degmooyinka iyo Gobollada

1. Waa inuu yahay/tahay muwaadin Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed.
2. Waa inuu u dhashay/u dhalatay Deegaankaas.
3. Waa in aan da'diisu/da'deedu ka yareyn 25 sano.
4. Waa inuu leeyahay/leedahay akhlaaq wanaagsan, dhimirkiisuna dhan yahay.
5. Waa inuu leeyahay/leedahay ugu yaraan aqoon Dugsi Dhexe ama aqoon u dhiganta iyo waaya-aragnimo (Guddoonka Heer Degmo)
6. Waa inuu leeyahay/leedahay ugu yaraan aqoon Dugsi Sare iyo waaya-aragnimo (Guddoonka Heer Gobol).

## Qodobka 11aad: Xil waayidda Xubinnimada Golaha Degmada iyo kan Gobolka.

1. Geeri.
2. Istiqaalo Qoraal ah.
3. Denbi xukun Maxkamadeed oo kama danbeys ah.
4. Xil gudasho la'aan joogta ah oo gaareysa Toban (10) Fadhi oo isku xigta oo sabab la'aan ah.
5. Guddoomiyaha Degmada iyo ku xigeenadiisa, Guddoomiyaha Gobolka iyo ku xigeenadiisa waxaa kale oo ay xilalka ku waayi karaan kalsooni kala noqosho ugu yaraan 2/3 (Saddex Meelood Laba Meel) xubnaha Golaha Deegaanka Degmada iyo Gobolka. Waxaana motion ka keeni kara Xubnaha Golaha Deegaanka. sadex meelood hal meel (1/3).

## Qodobka 12aad: Dhaarta

1. Xubin kasta 00 100 soo doorto Golaha Degmada iyo kan Gobolka wuxuu marayaa dhaarta soo socota; "Waxaan ku dhaaranaya Magaca Ilaahay inaan xilka la ii doortay u guto si daacad ah oo danta dalka, dadka iyo Diinta kujirto dhowrana Dastuurka Qaranka iyo Shuruucda kale ee dalka

## Qodobka 13aad: Xasaanad

1. Qof kasta oo ka mid ah Goleyaasha Degmooyinka iyo Gobollada lama qaban karo lamana baari karo jirkiisa iyo gurigiisa, hadii aan lagu helin isagoo fal dambiyeed gacanta kula jira,
2. Haddii ay caddaato in lagu qabto asagoo fal dambiyeed gacanta kula jira waa in si deg deg ah loo gaarsiiyaa guddoonka golaha uu xubinta ka yahay si loo ansixiyo qabashadiisa.
3. Sidoo kale xubinta lagu helo dambi si looga qaado xasaanada waxaa la marayaa sida sharcigu qabo.
4. Xasaanadaas waxay ku egtahay intuu xilka haayo.

## Qodobka 14: Guddiga Maamulka Degmada Xubnaha Guddiga Maamulka Degmadu waxay ka kooban yahiin 14 xubnood

1. Guddoomiyaha Degmada ahna Duqa Magaalada
2. Guddoomiye-ku-xigeen Koowaad
3. Guddoomiye ku xigeenka Labaaad
4. Xoghayaha-Arrimaha Bulshada
5. Xoghayaha Qorsheynta iyo Hormarinta Mashaariicda.
6. Xoghayaha Dhaqaaalaha iyo Maaliyada,
7. Xoghayaha Howlaha Guud, Tamarta iyo Isgaarsiinta.
8. Xoghayaha Nabadgelyada.
9. Xoghayaha Dhalinyarada iyo Isboortiga.
10. Xoghayaha Garsoorka, Arrimaha Diinta iyo Awqaafta.
11. Xoghayaha Dhulka, Deegaameynta, Horumarinta, Dalxiiska iyo Badbaadinta Duurjoogta.
12. Xoghayaha Warfaafinta, Hiddaha, iyo Horumarinta Fanka.
13. Xoghayaha Horumarinta Reer miyiga, Wax soosaarka iyo Dhowrista Bii'ada.
14. Xoghaya Horumarinta Haweenka, Daryeelka Arrimaha Qoyska iyo La dagaallanka Caadooyinka xun xun.

## Qodobka 15aad: Waajibaadka Guddiga Maamulka Degmada.

Maamulka Degmada waa awoodda ugu sarreysa ee Maamulka Degmada, wuxuuna u xilsaaran yahay:

1. Isku-duwidda iyo habsami u socodka howlaha maamulka degmada.
2. Sugida amniga iyo xasiloonida Degmada.

3. Xiriirka maamulka Degmada iyo Gobolka.
4. Diyaarinta, isku-duwidda iyo kormeerka mashaariicda horumarineed ee Degmada.
5. U gudbinta maamulka Gobolka ku talagalka miisaaniyad sanadeedka, miisaaniyad ku celinta, dakhliga iyo xisaab xir sanadeedka ee degmada
6. Isku-duwida xiriirka laamaha Dowlada ee Degmada & hay'adaha kale
7. U gudbinta Golaha Degmada awaamiirta iyo mashruucyada sharciga ee Gobolka.
8. Daryeelka caafimaadka guud, ka hortaga cudurada faafa, kor u qaadidda nadaafadda fayadhowrka magaalada iyo tuulooyinka la xariira degmada.
9. Ururinta Canshuuraha iyo dakhliga Degmada si waafaqsan sharciga canshuuraha ee Dowlada Hoose .
10. Asaasidda suuqyo badeeco iyo kuwa xoolaad.
11. Kormeerka dhismooyinka cusub, kuwa la cusbooneysiinayo iyo kuwa ku haboon in la dumiyo si sharciga waafaqsan.
12. Wax ka qabashada dhibaatooyinka abaaraha, fatahaaadaha, dufaannada, xaalufinta deeganka, dabka halista ah iyo dhibaaato kasta oo wax u dhimi karta bulshada deegaanka ku nool.
13. Daadgureenta dadweynaha hadii ay dhibaato ku timaado iyadoo lala kaashanayo Gobolka, Dowlad Gobolleedyada, iyo hay'adaha dowlada federaalka ah.
14. Qorsheynta iyo fulinta mashaariicda lagu hormarinaayo dhaqaalaha Degmada.
15. Kordhinta wax soo saarka iyo abuuridda ilo dhaqaaale.
16. Dhisidda dugsiyada aasaasiga ah, kuwa quraanka, xarumaha hooyada iyo dhalaanka (MCH) iyo xanaanada agoonta, Naafada iyo goobaha cibaadada.
17. Horumarinta Fanka, Isboortiga, Hidaha iyo Dhaqanka.
18. Diyaarinta mashaariicda la xiriira biyaha, koronta galinta Degmada iyo adeegyada kale ee lagama maarmaanka ah.
19. Dayactirka waddooyinka Degmada
20. Kor u qaadidda bilicda Magaalada iyo Tuulooyinkeeda.
21. Sameynta Warqadaha Aqoonsiga, diiwaangelinta Dadweynaha Degmada iyo xafidaada diiwaanka dhalashada, dhimashada, guurka iyo furitaanka
22. Diiwaangelinta hantida maguurtada ah ee Degmada, Tuulooyinkeeda iyo dhowrista Goobaha Taariikhiga ah.

23. Abuuridda gaadiidka Dadweynaha iyo wixii kale ee loogu danaynayo dadweynaha Degmada iyo Tuulooyinkeeda.
24. Naqshadda, Magaaleynta, Ruqsadaha dhul bixinta iyo dhismooyinka.
25. Dhismo goobo ganacsi oo loogu talo galay dadweynaha si loogu abuuro degmada ilo dhaqaale oo cusub.
26. Dib u soo celinta hantida maguurtada Qaranka ee Degmada.
27. Isu celinta hantida la kala haysto (Guurto iyo Maguurto).
28. Maamul u sameynta Tuulooyinka Degmada.
29. Bixinta Shatiyada Ganacsiga ee Degmada.
30. Magacaabista madaxda laamaha Degmada iyo ka ansixintooda Golaha Deegaanka.
31. Ansixinta Shaqaalaha Degmada laga qorayo ama la ruqsaynayo si waafaqsan xeerka shaqaalaha Qaranka.
32. Talo u soo jeedinta Guddiga Maamulka Gobolka, xil u dhiibidda iyo ka qaadidda xoghayeyaasha Dowladda Hoose ee Degmooyinka.

**Qodobka 16aad: Guddiga Nabadgelyada Degmada**

Guddiga Nabadgelyada waxaa uu ka kooban yahay waajibaadkiisuna yahay sida soo socota:

1. Guddoomiyaha Degmada ahna duqa Magaalada
2. Labadiisa ku Xigeen
3. Taliyaha Ciidanka Booliska Degmada
4. Taliyaha Ciidamada Asluubta Degmada.
5. Taliyaha Ciidamada Nabadsugidda Degmada.
6. Xoghayaha Nabadgelyada Degmada.
7. Xilkooda waxa ka mid ah in ay sugaan Amniga iyo Xasiloonida Degmada iyo Tuulooyinkeeda. Waana in ay ka hortagaan wixii khalkhal gelinaya deegaanka Degmada iyagoo dhowraya shuruucda dalka iyo xuquuqda muwaadiniinta.

**Qodobka 17aad: Mas'uuliyadda Guddoomiyaha Degmada ahan Duqa Magaalada**

1. Duqa Magaaladu waa madaxa Dowladda Hoose ee Degmada.
2. Wuxuu isugu yeeraa isla markaana gudoomiyaa shirarka maamulka Dowladda Hoose.
3. Wuxuu kormeeraa baaritaanna ku sameeyaa habsamhi u socodka howalaha Dowladda Hoose.
4. Wuxuu saxiixaa heshiisyada Dowladda Hoose.
5. Wuxuu oggolaadaa kharashyada Dowladda Hoose iyadoo la

waafajinayo sharciyada kharash bixinta.

6. Wuxuu warbixinjoogta ah u gudbiyaa Golaha Gobolka.
7. Wuxuu magacaabaa Taliyaha Ciidanka Deegaanka, isagoo la tashanaya ku xigeennadiisa iyo xoghayaha Dowladda Hoose.

**Qodobka 18aad: Xoghayeyaasha Dowladaha Hoose**

1. Dowladaha Hoose ee Degmooyinka waxey yeelanayaan xoghayeyal fulineed oo aqoon iyo waayo-aragnimo wanaagsan u leh howlaha Dowlada hoose

**Qodobka19aad: Waajibaadka Xoghayaha Dowladda Hoose ee Degmada.**

1. Xoghayaha dowlada hoose waxa uu madax ka yahay maamulka shaqaalaha ee Dowlada Hoose.
2. Waxa uu maamulaa maaliyadda Dowladda Hoose si waafaqsan sharciga maamul lacageedka.
3. Wuxu u xilsaaran yahay keydinta qoraalada iyo dokumentiga Dowladda Hoose
4. Dhowrista xuquuqda iyo anshaxa shaqaalaha Dowlada Hoose.
5. Kormeerka iyo fulinta mashaariicda horumarineed ee Dowladda Hoose
6. Diyaarinta miisaaniyadda Dowladda Hoose, ururinta canshuuraha iyo dakhliga kale ee Dowladda Hoose.
7. Ilaalinta kharashka iyo dakhliga Dowladda Hoose.
8. Fulinta shuruucda Dowladda Hoose, diiwaangelinta iyo xafidaadda go'aannada iyo fulinta awaamiirta Duqa Magaalada.
9. Diyaarinta xisaab xirka miisaaniyadda Dowladda Hoose.
10. Qaadidda hadal-qoraalada shirarka Golaha Degmada.

**Qodobka 20 aad: Waajibaadka ku xigeenada Guddoomiyaha Degamada ahna Duqa Magaalada.**

1. Waxay qabtaan wixii hawl ah ee uu u xilsaaro Guddoomiyaha Degmadu
2. Guddoomiye Kuxigeenka Kowaad wuxu si KMG ah u qabtaa xilka Guddoomiyaha marka uu maqan yahay, geeriyoodo, xilka laga qaado, is casilo ama xilgudasho la'aani ku timaaddo.
3. Waa in Soddon (30) Maalmod gudahood la doortaa kursiga banaanaaday laga bilaabo maalinta la baneeyey.

**Qodobka 21aad : Xubnaha Golaha Gobolka ;**

A. Xubnaha Golaha Gobolka waxay ka kooban yihiin hadba inta Degmo ee Gobolkaas leeyahay iyadoo la waafajinayo Masuuliyiinta haya Xilalka ku xusan Faqradaha 1aad ilaa 14aad ee Qodobkan.

B. Muddada ay xilka haynayaan waa labo (2) sano hadii aysan imaan shuruudaha ku xusan Qodobka 9aad faqradiisa 1aad ilaa 5aad ee sharcigan.

1. Guddoomiyaha Gobolka
2. Guddoomiye ku Xigeenka Kowaad
3. Guddoomiye ku Xigeenka Labaad
4. Xoghayah Arrimaha Bulshada
5. Xoghayaha Arrimaha qorshaynta iyo Horumarinta mashaariicda
6. Xoghayaha Dhaqaalaha iyo Maaliyadda
7. Xoghayaha Hawlaha guud, Tamarta iyo Isgaarsiinta.
8. Xoghayaha Dhallinyarada iyo Isboortiga
9. Xoghayaha Garsoorka, Arrimaha Diinta iyo Awqaafta.
10. Xoghayaha Dhulka, Deegaameynta, Horumarinta Dalxiiska iyo Badbaadinta Duurjoogta.
11. Xoghayaha Horumarinta Daryeelka Haweenka, Arimaha Qoyska iyo la Dagaallanka Caadooyinka xun.
12. Xoghayaha Warfaafinta, Hiddaha iyo Horumarinta Fanka
13. Xoghayaha Horumarinta reer Miyiga iyo Dhowrista Bii'ada.
14. Xoghayaha Nabadgelyada Gobolka.

**Qodobka 22aad: Waajibaadka Xubnaha Golaha Gobolka**

Waajibaadka Xubnaha Golaha Gobolku waxaa ka mid ah:

1. Habsami u socodsiinta iyo isku Duwidda Hawlaha Maamulka Gobolka.
2. Sugidda Nabadgalyada iyo xasilloonida Gobolka iyo wax ka qabashada Masiibooyinka soo wajaha.
3. Xiriirinta, kormeerka hawlaha Degmooyinka Gobolka iyo isku duwidda howlaha laamaha Dowladda iyo Hay' adaha kale ee ka hawlgala Gobolka.
4. Diyaarinta miisaaniyadda iyo isku duwidda qorshaha hurumarineed ee Gobolka.
5. Dejinta iyo Meel marinta Xeer hoosaadyada lagu maamulo hawlaha kala duwan ee Gobolka iyo Degmooyinkiisa si waafaqsan shuruucda dalka.
6. Soo jeedinta magacaabidda Guddoomiyaha Maxkamadda Rafcaanka, Xeer-ilaaliyaha Gobolka, Guddoomiyayaasha Maxkamadaha Degmooyinka iyo Gobolka iyagoo u soo gudbinaya hay'adaha ay khuseyso si magacaabiddooda loo waafajiyo sharciga
7. Soo jeedinta magacaabista Taliyeyaasha Ciidanka booliiska, Asluubta iyo Nabadsugidda.

**Qodobka 23aad: Waajibaadka Guddoomiyaha Maamulka Gobolka**

1. Waa madaxa maamulka Gobolka,
2. Wuxuu Golaha Gobolka u soo jeediyaa magacyada iyo xilalka xubnaha Xoghayeyaasha Gobolka isagoo tixgelinaya awood qaybsiga beelaha Gobolka deggan.
3. Wuxuu u xil saaran yahay hubinta habsami u socodka hawlaha maamulka Gobolka.
4. Wuxuu u xil saaran yahay Xiriirinta Gobolka, Dowlad Gobolleedyada ama Dowladda dhexe ee Federaalka ah.
5. Isugu yeeridda xubnaha Golaha, diyaarinta ajendaha iyo guddoominta shirarka Golaha.
6. Isku duwidda dhammaan hawlaha maamulka Gobolka.
7. Saxiixidda heshiisyada Gobolku la gelayo maamullada Gobolada kale ee dalka, heshiisyada hay'adaha samafalka ee ka hawlgala Gobolka, go'aannada maamulka iyo wareegtooyinka si waafaqsan sharciga
8. U Gudbinta Golaha Gobolka miisaaniyad sannadeedka iyo xisaab xirka.
9. Kormeerka hawlaha kala duwan ee Xoghayeyaasha Gobolka.

**Qodobka 24aad: Waajibaadka Ku xigeennada Guddoomiyaha Gobolka**

1. Waxay qabtaan wixii hawl ah ee uu u xilsaaro Guddoomiyaha Gobolku.
2. Guddoomiye Ku xegeenka Kowaad wuxu si ku meel gaar ah u qabtaa xilka Gudoomiyaha marka uu maqan yahay, geeriyoodo, xilka laga qaado, is casilo ama xilgudasho la'aa‑ii ay ku timaaddo.

**Qodobka 25aad: Xilalka Xoghayeyaasha Gobolka.**

1. Mas'uuliyadda Xoghayeyaasha waa hoggaaminta arrimaha maamul iyo fulinta hawlaha kala duwan ee ay mas'uulka uga yihiin Gobolka.
2. Waajibaadkooda waxaa lagu qeexi doonaa Xeer gaar ah oo Golaha Gobolku soo saaray.

**Qodobka 26aad: Guddiga Nabadgelyada Gobolka**

Guddiga nabadgalyada gobolka wuxu ka kooban yahay xubnaha soo socda:

1. Guddoomiyaha Gobolka.
2. Labadiisa Ku xigeen.
3. Taliyaha Ciidanka Booliiska Gobolka.
4. Taliyaha Ciidanka Asluubta Gobolka.
5. Taliyaha Ciidanka Nabadsugidda Gobolka.
6. Xoghayaha Amniga iyo Nabadgelyada Gobolka.

**Qodobka 27aad: Waajibaadka Guddiga Nabadgalyada Gobolka.**

Waajibaadka Guddiga Nabadgelyada Gobolka waxaa ka mid ah:

1. Sugidda Amniga Gobolka

2. Xasilinta nabadgelyada Gobolka
3. Ka hortagga dhammaan wixi khalkhal gelinaya bulshada Gobolka iyagoo dhowraya shuruucda dalka

**Qodobka 28aad: Kormerka iyo Baarista Miisaaniyada ee Hanti-dhowrka Gobolada**

1. Haddii ay dowladda dhexe kabto miisaaniyadaha dowladaha hoose ee Gobollada, Degmooyinka iyo Dowlad Gobolleedyada waxa ka hawl gelaya hanti-dhowr ka madax bannaan maamulladooda oo hoos yimaada Hanti -dhowrka Guud ee Qaranka,

**Qodobka 29aad: Hantida Dowladdaha Hoose**

Hantida Dowladaha Hoose waa hanti qaran, waxaana loo isticmaalı karaa oo kaliya ujeedda qaran.

**Qodobka 30aad: Miisaaniyadda**

1. Miisaaniyadda ku talagalka ah ee Dowladaha Hoose iyo hay' adaha hoos yimaada waa miisaaniyada maamul gobolleedyada.
2. Sanad kasta maamulka dowladda hoose waxuu diyaarinayaa miisaaniyadda ku tala galka ee sannadka soo socda.
3. Miisaaniyadda ku tala galka waxaa la hordhigayaa golaha deegaanka oo leh awoodda ansixinta, Diidmada iyo wax ka bedelka.
4. Golaha Deegaanka Gobolku wuxuu ku soo lifaaqayaa hadal-qoraalkiisa ku saabsan miisaaniyadda, wuxuuna u gudbinayaa Dowlad Gobolleedyada ama Dowladda Dhexe.
5. Dowladaha Hoose waa in sanad kasta ay sameeyaan xisaab xir sanadeed oo uu ansixinteeda yeelanayo Golaha Deegaanka ee Gobolka

**Qodobka 31aad: Dakhliga Dowlada Hoose:**

Dakhliga maamullada Dowladaha Hoose wuxuu ka koobanyahay

A) Canshuuraha, dakhliyada adeega iyo kuwa xuquuqeed
B) Macaashka kasoo xarooda hantida guurtada ah iyo mida maguurtada ah ee D/hoose
C) Lacagta kasoo xaroota milkiyada hantida guurtada ah iyo tan maguurtada ah D/hoose
D) Lacagta kasoo xaroota dakhliyada kale ee sharcigu tilmaamayo.

**Qodobka 32aad: Habka Canshuur Saaridda.**

1. Si loo mideeyo tariifooyinka canshuuraha Degmooyinka, Gobollada iyo Dowlad Goboleedyada Dalka waxa loo dejinaya xeer gaar ah o mideeya
2. Golaha deegaanka marka canshuraha ama xuquuqda kale ee sharcigani u oggolyahay middood ama qayb ka mid ah uu raho in uu ku dabaqo Deegaanka, waa in uu u caddeeyaa Wasaarada Maaliyada si ay u diiwaan geliso talana uga bixiso.

3. Eeg Lifaaqa Canshuuraha

**Qodobka 33aad: Ururinta Dakhliga.**

1. Dakhliga D/hoose Waxaa lagu ururinayaa lacag caddaan ah oo shillin Soomaali ah.
2. Lacag kasta oo la qabto waa in lagu bixiyaa rasiid (Xaashida Lacag Qabashada) loogu tala galay) lagana ansixiyey goleyaasha deegaanka heer gobol iyo heer degmo lagana diiwaan geliyey wasaarada maaliyada iyo xisaabiyaha guud ee qaranka.
3. Dhamaan Dakhliga la uruuriyay waa in isla maalintaas lagu shubaa Khasnada Dowlada Hoose ee ka furan Bangiga:
4. Hadii Dakhliga la ururiyay lagu shubi waayo khasnada Dowlada Hoose isla maalintaas waxa sharciga lala tiigsanayaa cida masuulka ka ah

**Qodobka 34aad: Kharajka.**

1. Dowladaha Hoose waxay bixin karaan kharajka loogu ogolaaday miisaaniyadda oo noqon kara:

A) Kharajka loogu tala galay socodsiinta hawlaha caadiga ah.
B) Kharajka hirgelinta mashaariicda Horumarinta Bulshada Deegaanka.
C) Kharaj ah deeq ay kaalmo u bixiyeen.

2. Kharaj kasta ee la bixinaayo waa in loo sameeyaa (Xaashida Lacag Bixinta) loogu tala galay oo ay ku lifaaqan tahay documenti caddeynaya kharajka , waana in ay saxiixaan dadka sharcigu tilmaamayo iyo dhinaca lacagta qaadanaya, waana in ay waafaqsanaataa sharciga iyo xeerka xisaabaadka dowladda.
3. Dhamaan qarashbixinta ku xusan qodobka 32aad ee sharcigan faqradaha 1aad iyo 2aad qarash lama bixin karo hadaanay horay ugu jirin miisaaniyada
4. Haddii ay timaado xaalad deg deg ah loona baahdo qarash dheeri ah waa in si deg deg ah loo fadhiisiyo goleyaasha deegaanka si ay u ansixiyaan qarashka dheeriga ah iyo baahida keentay.

**Qodobka 35aad: Habka Xisaabaadka.**

Maamulka dowladaha hoose waa in ay ku dhaqmaan hab xisaabeed waafaqsan sharciga iyo nidaamka u degsan maamulka ay hoos yimaadaan waana in hab xisaabeedkaas si hufan u qeexaya maamulka hantida Dowladda hoose

**Qodobka 36aad: Masuuliyad Xisaabeed.**

1. Marka laga reebo masuuliyadda ciqaabeed ee ka imaan karta qof kasta ee bixiya ama amra in la bixiyo kharaj aan sharciga waafaqsaneyn ama feejignaan la,aan darteed sabab u noqda maqnaansho hanti dowladda Hoose leedahay, waxaa khasab ku ah in uu soo celiyo hantida la bixiyey ama maqan.

2. Masuuliyadda soo celinta hantida ku xusan faqrada kowaad ee qodobkan waxay ku dhaceysaa qofka bixiyey, haddii uusan amar qoran ka haysan Golaha Deegaanka.
3. Haddii la isku khilaafo sharciga waafaqsanaanta hanti bixinta loogana dooday shirka Golaha Deegaanka, Xoghayaha Dowladda Hoose ama qofka u xilsaaran hadal-qoraalka waxaa waajib ku ah in uu diiwaan geliyo magacyada xubnaha oggolaaday bixinta hantidaas.
4. Xaaladaha aan ku xusneyn sharcigaan, dowladaha Hoose waxay ku dhaqmayaan sharciga iyo Xeer Hoosaadka Dowladda Dhexe.

**Qodobka 37aad: Gunnooyinka, Mushaarooyinka Madaxda, Shaqaalaha Degmooyinka iyo Gobollada**

1. Gunnooyinka, mushaarooyinka madaxda, shaqaalaha Degmooyinka iyo Gobollada waxa lagu qeexi doona xeer gaar ah oo ay soo saareen goleyaasha deegaanka heer gobol iyo heer degmo iyo Dowlad Goboleedyada

**Qodobka 38aad: Maxkamadaha**

Gobol kasta wuxu yeelanayaa:

1. Maxkamadaha derajada 1aad oo kala ah:
   A) Maxkamadda Degmada
   B) Maxkamadda Gobolka
2. Maxkamada Derajada 2aad oo ah Maxkamadda Racfaanka Gobolka

**Qodobka 39aad: Xeer-ilaalinta Gobolka**

Gobol kasta oo ka mid ah dalka wuxu yeelanayaa Xeer-ilaaliye Gobol oo qayb shaqo ahaan ka mid ah hay'ada Garsoorka Gobolka, waxayna ka kooban yihiin:

1. Xeer-Ilaaliyaha Gobolka oo ah madaxa xafiiska xeer-Ilaalinta Gobolka
2. Xeer-Ilaaliyaha Degmada oo ah madaxa xafiiska Xeer-ilaalinta Degmada

**Qodobka 40 aad: Dhismaha iyo Waajibaadka Ciidanka Booliiska, Asluubta iyo Nabadsugidda Degmooyinka iyo Gobollada**

1 Degmo iyo Gobol kasta oo ka mid ah dalka waxa ka hawl gelaya ciidamo booliis, Asluub iyo nabad sugid oo heer degmo iyo heer gobol ah oo u xil saaran sugidda nabadgelyada, xasilloonida iyo ilaalinta sharciga, Maxaabiista iyo dhaqan celintooda, iyo ka hortagidda dhibaato kasta oo wax yeleyneysa amniga iyo habsami u socodka hawlaha Degmoyinka iyo Gobolada

**Qodobka 41aad: Xubintii bannaysa xilka Xubinnimada Golayaasha Degmooyinka iyo Gobollada**

1. Xubinta bannaysa xilka xubinnimada Goleyaasha Degmooyinka iyo Gobollada Waxaa soo xulaya madax dhaqameedka Beesha xubinta

banneysay, waxaana ansixinaya Golaha Deegaanka muddo 30 maalmood gudahood ah.

**Qodobka 42aad: Fadhiyada Golayaasha Degmooyinka iyo Gobollada**

1. Goleyaashu waxay samaysanayaan xeer-hoosaadyo nidaamiya fadhiyadooda, fadhiga ugu hoorreeyana waxay yeelanayaan 30 cisho gudahood marka lagu dhawaaqo natiijada.

**Qodobka 43aad: Faragelinta Dowladda Federaalka ah ee Xalinta khilaafaadka Maamullada Degmooyinka, Gobollada iyo Dowlad Gobolleedyada**

Dowladda Federaalka waxay dhexgeli kartaa maamullada Degmooyinka, Gobollada iyo Dowlad Gobaleedyada marka:

1. Haddii Maamulka heer Degmada uu Khilaaf suo dhexgalo waxaa lagu xalinayaa Golayaasha Deegaanka Heer Gobol.
2. Khilaafka ka yimaada Golaha Maamulka heer Gobol waxaa xalinaya Dowlad Gobaleedka uu ka tirsan yahay ama Dowlada Dhexe si waafaqsan Dastuurka federalka kmg.
3. Hadii Dowlad Gobaleedyada khilaaf soo dhex galo waxay Dowlada dhexe ee Federalka ka codsan karaan inay gacan ka siiso xalinta khilaafka.
4. Haddii ay dhacdo masiiba dabiici ah (Disaster), Dowladda Federaalka waxay si rasmi ah ugu dhawaaqeysaa inay dhacday masiiba qaran, waxayna la wareegeysaa masu'uuliyadda maareynta masiibadaas iyadoo la kaashaneysa maamulada Deegaankaas.

**Qodobka 44aad: Baabi'In**

1. Dhamaan wixii shuruuc ah ee kasoo horjeeda sharcigan waa la baabi'iyey.
2. Wixii sharcigan laga waayo waxaa loola noqonayaa shuruucdii hore u jirtay ee aan ka hor imaanaynin sharcigan iyo Dastuurka Federaalka Ku Meel Gaarka ah.

**Qodobka 45aad: Dhaqangal**

1. Sharcigan waxa uu dhaqan gelayaa marka uu oggolaado Baarlamaanka Federaalka ah uuna saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, laguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda.

**XEER MADAXWAYNAHA Lr. 118** Taariikh: 07/08/2013

Oggolaanshaha Ansaxinta Heshiiska Soomaaliya iyo Turkiga kuna saabsan Tababarrada Ciidamada iyo Protocol-ka Dhaqangelinta Dhaqaale

## MADAXWAYNAHA J. F. S

**Markuu arkay:** Qodobka 87aad, Xarafka 'C' iyo Qodobka 90aad, Faqradda 6aad ee Dastuurka J.F.S

**Markuu arkay:** Warqadda Wasiirka Koowaad Lr. XRW/00171/12/12 ee 17/12/2012 kuna saabsan u soo gudbinta Miisaaniyadda Golaha Shacabka.

**Markuu arkay:** Warqadda Guddoomiyaha Golaha Shacabka Lr. 614-XG-08-13 ee 05/08/2013 kuna saabsan ansaxinta Heshiiska Tababarada Ciidamada iyo Protocol-ka Dhaqangelinta ee Iskaashiga Dhaqaale ee u dhexeeyo labada dal.

**Isaga oo tixgelinaayo:** inay dan u tahay Dalka iyo Dadka Soomaaliyeed

Wuxuu soo saaray Xeerkaan

### Qodobka 1aad

laga bilaabo Maalinta uu Madaxwaynaha Jamhuuriyadda Soomaaliya Saxiixo Xeerkaan, waxuu Madaxwaynaha oggoladay Ansaxinta Heshiisyada Dhexmaray Soomaaliya iyo Turkiga oo kala ah Heshiiska Tababarada Ciidamada iyo Protocol-ka Dhaqangelinta Iskaashiga Dhaqaale ee labada dal.

### Qodobka 2aad.

Waxuu Xeerkaan dhaqangeliyaa maalinta uu Madaxwaynaha Saxiixo waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ee Jamhuuriyadda Soomaaliya.

**MUQDISHO 07/08/2013**

XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
WAA LA DIIWAANGELIYAY
DIWAAN NO.
TAARIIKH
SAXIIXA NO.

Madaxwaynaha
Mudane Xasan

Republic of Somalia
Office of the President

# JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
# GOLAHA SHACABKA

# PROTOCOL-KA ISKAASHIGA JAMHUURIYADDA SOMAALIYA IYO JAMHUURIYADDA TURKIYA

Taariikhda la-Ansixiyay
20 Luulyo 2013

## Tusmo

Hirgalinta borotokoolka ku saabsan taageerada dhaqaale ee

Jamahuuriyadda Soomaaliya iyo Jamhuuriyadda Turkiga............................

Qodobka 1aad: Ujeedka ......................................................................

Qodobka 2aad: Baaxada ......................................................................

Qodobka 3aad: Mabaadiida dhaqangelinta .............................................

Qodobka 4aad: Sugnaanta Xogta Amni ....................................................

Qodobka 5aad: Maareynta Qilaafka ........................................................

Qodobka 6aad: Dib u eegis iyo Wax kabedel.. ..........................................

Qodobka 7aad: Ansixinta iyo Dahaqan gelinta .........................................

Qodobka 8aad: Jiritaanka iyo Baabiinta heshiiska .....................................

Qodabka 9aad: Dhigaal iyo Saxiixa .. .....................................................

**HIRGALINTA BOROTOKOOLKA KU SAABSAN TAAGEERADA DHAQAALE EE JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA IYO JAMHUURIYADDA TURKIGA**

Xukuumadda Jamhuuriyadda Soamaaliya iyo Xukuumadda Jamhuuriyaradda Turkiga, (oo halkan ka dib, loogu magac dari doono "dhinacyada"), Waxay ku heshiiyeen arrimaha soo socda ee ku saabsan taageerada dhaqaale ee lagu dhex qoondeynayo heshiiska iskaashiga militeriga ee la saxiixay taariikhdu markay aheyd 5tii December 2012.

**Qodobka 1aad: Ujeedka**

Ujeedka Porotokoolka waa in lagu abuuro qodobada hirgalinta taageerada dhaqaale oo ah 120.000 LT ama qiime u dhigmo doolar ahaan ( Boqol iyo labaatan kun oo Liiraha Turkiga ) in ay bixiso Jamhuuriyadda Turkiga oo la siinayo Jamhuuriyadda Soomaaliya.

**Qodobka2aad: Baaxada**

Taageerada dhaqaale ee ay bixineyso Jamhuuriyadda Turkiga waxaa loo isticmaalayaa in lagu bixiyo lacagta tababarka iyo qarashaadka booqashada saraakiisha ciidamada qalabka sida Jamhuuriyadda Soomaaliya oo soo booqan doona Jamhuuriyadda Turkiga iyo wixii qarashaad dheeraad ah ee soo kordha.

**Qodobka 3aad: Mabaadiida dhaqangelinta**

1. Dhaqaalaha loo qorsheeyey Jamhuuriyadda Soomaaliya ee Porotokoolkan waa in uu jiraa ilaa iyo 31 ka December 2017.
2. Lacag Doolar ahaan u dhiganta 120.000 LT ( Boqol iyo labaatan kun Liiraha Turkiga) ayaa loo qoondeeyey in lagu bixiyo tababarka iyo qarashaadka booqashada xubnaha ciidamada Qalabka sida ee Jamhuuriyadda Soomaaliya ee ku tegaya Jamhuuriyadda Turkiga, kharashaadka kale ee soo bixi kara waa sida soo socota.

Kharashaadka xubnaha ciidamadda Qalabka sida ee Jamhuuriyada Soomaaliya ku cad hoos waxay ku xisaaban yihiin ilaha dhaqaale ee loo qondeeyey.

a. Kharashaadka xubnaha Ciidamada qalabka sida ee Jamhuuriyadda Soomaaliya oo ka qeyb geli doona iskaashiga nabada iyo casharada laga qaadanayo xarunta difaaca iyo la dagaalanka argagixisada, waxay dhan tahay 80.000 00 u dhiganta Liiraha turkiga.
b. Booqashada rasmiga qarashkeeda ay xubnaha ciidanka qalabka sida ee Jamhuuriyada Soomaliya, marka ay booqanayan Jamhuuriyadda Turkiga wuxuu muteysanaya 20.000 ee liiraha turkiga
c. Qarashaadka kale ee lagu daboolayo baahiyaha soo ifbaxo, waxay noqneysaa doolar ahaan qiimo u dhan (wuxuu muteysanayaa)

3) Taageerada dhaqaale ee loo qoondeeyey sida ku xusan Porotokoolka waa In ay soo wareejiso Wasaarada Gaashaandhiga ee Jamhuuriyada Turkiga ee Sanduuqa Bangiga u qeybsaha Militeriga Dowlada Turkiga ee Nairobi Kenya, dhaqaalaha la soo wareejiyo waxaa maamuli doona u qeybsanaha Militeriga Safaarada Turkiga Ku leedahey Dalka Kenya - Nairobi isagoo katilmaan qaadanaya Taliyaha Jamhuuriyadda Turkiga.
4) Wareejinta Qarashaadkaasi ee hadba Baahida jirta waxaa hagaya Taliyaha Ciidanka Militeriga, Markii loo baahdo.

**Qodobka 4aad: Sugnaanta Xogta Amni**

Jamhuuriyada Soomaliya waa in ay sugtaa arimaha uu xambaarsan yahey Porotokoolka dhaqan gelintiisa heshiiska labada dal in la ilaaliyo xogaha ay isweydaarsanayaan labada dal, dhinac sadexaad, dowlada, Kambani, shaqsi, iyadoon laga heysan ogalaasho qoraal ah Jarnhuuriyadda Turkiga maadaama xog ilaalinta ee sii soconeyso xitaa marka uu soo afjarrno Borotakoolka.

**Qodobka 5aad: Maareynta Qilaafka**

1. Hadii uu yimaado qilaaf nooc kasta ah oo la dhaqan gelinta, fasiraada borotakoolka qilaafkaasi waa in aan loo soo bandhigin dhinac sadexaad, gudi dhexdhexaadin ah, iyo Maxkamada Caalamiga, waa in lagu xaliyaa qaab wadaxaajood ah.
2. Arrimaha aan lagu xusin Borotoakoolka ee xiriirka la leh heshiiska iskaashiga Militeriga ee la saxiixey 5tii Disember 2012 waa in lala xeeriyaa.
3. Qodabada Borotakoolka waa in aysan waxyeeleneynin xuquuqda iyo waajibaadka ka dhasha heshiisyada caalamiga ee labada dhinac ku jiraan.

**Qodohka 6aad: Dib u eegis iyo Wax kabedel**

1. Dhinac walba wuxuu soojeedin karaa dib u eegis iyo wax ka bedel Borotakoolka markaasi dhinacyada waxay bilaabayaan 30 casho gudahooda ugu danbeyn markey soo gaadho warqad qoraal ah.
2. Wax kabedelka ee labada ku heshiiyaan oo qoraal ah wuxuu dhaqan gelayaa habka iyo hanaanka ku qeexan qodobka 7 aad
3. Hadii aan natiijo laga gaarin 60 maalin gudahood marka wadatashiga bilowdo , borotakoolka waa tuurayaa sida ku cad qodobka 8 aad
4. Labada dhinac waxay sii wadayaan waajibaadka kaga aadan borotakoolka mudada wadaxaajoodka socdo.

**Qodobka 7aad: Ansixinta iyo Dahaqan gelinta**

Borotakoolka wuxuu dhaqan gelayaa taariikhda ay labada dhinac kala helaan wargelin qoraal ah, la isuna marinayo ilaha Diblomaasiyadeed, lagu soo afjaro ..... .iyo hanaanka sharci ee lagu maamulayo dhaqan gelinta borotakoolka

## Qodobka 8aad: Jiritaanka iyo Baabi'inta heshiiska

1. Borotakoolkani wuxuu soconayaa inta dhaqaalaha loo qorsheeyey Dowlada Soomaaliya uu ka dhamaanayo ama si kastaba ku soo afjarmo
2. Marka mid ka mid ah labada dhinac uu awoodi waayo in uu u hogaan samo ama garwaaqsado in dhinaca kale aanu u hogaansaneyn, qodobada borotakoolka labada dhinac waa in ay soo jeediyaan wadatashi qaab qoraal ah ku saleysan.
3. Wada tashigaas waa in uu bilowdaa ugu danbeyn 30 maalmood gudahooda kadib markii ay soo gaadho wargelin qoraal ah hadii wax natiijo ah laga gaadhi waayo ka dib 45 ta maalmood ee xiga gudahood waa in mid ka mid ah uu baabi'in karo heshiiskan, 60 maalmood gudahood ama inta taariikhda ay ka soo gadho warbixn qoraal ah.

## Qodabka 9aad: Dhigaal iyo Saxiixa

1. Borotakoolkan waxaa lagu diyaariyey laba nuqul oo ah asal ah (Original) oo ku kala qoran ingiriis iyoTurki, dhigaal walbana uu kan kale waafaqsan yahay ama la mid yahay, hadii uu khilaaf ka dhasho dhaqangelinta borotakoolkan waxaa la cuskanayaa dhigaalka Ingiriiska ah.
2. Iyadoo goobjoog laga yahey, labada dhinac waxaa u kala saxiixey wakiilo rasmi ah oo labada dhinac u kala igmadeen, saxiixa borotakoolka, Saxiixa 5tii Disember 2012 Magaalada Ankara JamhuuriyaddaTurkiga

| Dhinaca Xukuumadda Soomaaliya | Dhinaca Jamhuuriyadda Turkiga |
|---|---|
| Saxiixa | Saxiixa |
| Magaca: Abdulhakim Haji Fiqi | Magaca: Ismet YILMAZ |
| Darajada: Wasiirka Difaaca | Darajada: Wasiirka Difaaca Qaranka |

# AGREEMENT

# BETWEEN

# THE GOVERNMENT OF THE REPUBLIC OF

# SOMALIA

# AND

# THE GOVERNMENT OF THE REPUBLIC OF

# TURKEY

# ON

# MILITARY TRAINING COOPERATION

# THE IMPLEMENTATION PROTOCOL REGARDING THE FINANCIAL ASSISTANCE BETWEEN THE GOVERNMENT OF THE SOMALI REPUBLIC AND THE GOVERNMENT OF THE REPUBLIC OF TURKEY

## THE IMPLEMENTATION PROTOCOL REGARDING THE FINANCIAL ASSISTANCE BETWEEN THE GOVERNMENT OF THE SOMALI REPUBLIC AND THE GOVERNMENT OF THE REPUBLIC OF TURKEY

The Government of the Somali Republic and the Government of the Republic of Turkey (hereinafter shall be referred to as Parties) have agreed on the following issues with regard to the financial assistance to be allocated within the framework of Military Financial Cooperation Agreement dated on December 5, 2012.

### ARTICLE-1
### PURPOSE

The purpose of this Protocol is to establish the implementation principles of the financial assistance in the amount of U.S.Dollars equivalent to 120.000 TL (one hundred twenty thousand Turkish Liras) to be provided by the Government of the Republic of Turkey to the Government of the Somali Republic.

### ARTICLE-2
### SCOPE

The financial assistance to be provided by the Government of the Republic of Turkey shall be used to meet the course fee and visit expenses of the personnel of the Armed Forces of the Somali Republic who shall visit the Republic of Turkey, as well as other charges that may arise accordingly.

### ARTICLE-III
### IMPLEMENTATION PRINCIPLES

1. The resource allocated to the Government of the Somali Republic with this Protocol shall be made available till 31 December 2017.
2. U.S.Dollars equivalent to 120.000 TL (one hundred twenty thousand Turkish Liras) is allocated to meet the course fee and visit expenses of the personnel of the Armed Forces of the Somali Republic who shall visit the Republic of Turkey as well as other charges that may arise accordingly.

The expenses the personnel of Armed Forces of the Somali Republic defined below shall be borne from the allocated source:

a. Expenditures of the personnel of the Armed Forces of the Somali Republic who shall attend to Partnership for Peace and Centre of Excellence Defense Against Terrorism Courses, in the amount of U.S.Dollars equivalent to 80.000 TL (eighty thousand Turkish Liras),
b. Official visit expenditures of the personnel of the Armed Forces of the Somali Republic who shall visit the Republic of Turkey in the amount of U.S.Dollars equivalent to 20.000 TL (twenty thousand Turkish Liras),
c. Expenditures to meet the other needs that may arise accordingly, In the amount of U.S dolars equivalent to 20.000TL (twenty thousand Turkish Liras).

3. The financial assistance allocated according to the Protocol shall be transferred by the Ministry of National Defense of the Republic of Turkey to the bank account of Nairobi/Kenya Military Attache of the Republic of Turkey. The financial resource shall be used under the supervision of Nairobi/Kenya Military Attache of the Republic of Turkey in the framework of the directives given by the General Staff of the Republic of Turkey.
4. Transfer of the resources between needs shall be conducted by the General Staff of the Republic of Turkey, when necessary.

**ARTICLE-IV**

**SECURITY OF CLASSIFIED INFORMATION**

The Government of the Somali Republic shall not disclose the content and Implementation of the Protocol or the classified information which shall be exchanged between the Parties to a third Party government company or person without written consent of the Government of Republic of Turkey. This principle of confidentiality shall continue to apply even after termination of the Protocol

**ARTICLE-V**

**SETTLEMENT OF DISPUTES**

1. In case of any dispute that may arise due to implementation or interpretation of this Protocol, the dispute shall not be brought to any third party, arbitration board or international court and shall be settled through negotiations.
2. With regard to the issues not covered by this Protocol, the relevant provisions of the "Military Financial Cooperation Agreement" signed on December 5, 2012 shall be applied
3. Provisions of this Protocol shall not affect the rights and obligations arising from other international agreements of the Parties.

**ARTICLE-VI**

**REVISION AND AMENDMENT**

1. Each Party may propose revision or amendment of this Protocol. In this case, the Parties will start discussions within 30 (thirty) days at the latest of receipt of written notification thereof
2. Amendments agreed upon by the Parties in writing shall enter into force in accordance with the procedure prescribed in Article VII.
3. If no results are obtained within 60 (sixty) days after consultations begin, this Protocol will be terminated in accordance with the provisions in Article VIII.
4. The Parties shall continue to fulfill their obligations arising from this Protocol during the negotiation process

## ARTICLE-VII
## RATIFICATION AND ENTRY INTO FORCE

1. This Protocol shall enter into force on the date of receipt of the last written notification by which the Parties notify each other, through diplomatic channels, of the completion of their Internal legal procedures required for entry into force of the Protocol.

## ARTICLE-VIII
## DURATION AND TERMINATION

1. This Protocol shall be in force until the financial resource allocated to the Government of the Somali Republic is entirely used, and by all means till 31 December 2017.
2. In the event that one of the Parties unable to comply or concludes that the other Party is not complying with the provisions of this Protocol, the Parties shall be able to propose a consultation in written form. These consultations shall be started at latest within 30 (thirty) days after the written notification has been received if no result is reached within following 45 (forty five) days. Either Party shall terminate this Protocol within 60(sixty)days from the date of receiving the written notification

## ARTICLE-IX
## TEXT AND SIGNATURE

1. This Protocol is prepared in two original copies in English and Turkish languages, each text being equally authentic. In case of any dispute that may arise due to implementation of this Protocol. English text shall prevail.
2. In witness whereof, the undersigned, being duly authorized representatives of both Parties have signed this Protocol on December 5, 2012 in Ankara/ the Republic of Turkey.

ON BEHALF OF THE GOVERNMENT OF THE SOMALI REPUBLIC

SIGNATURE :

NAME : Abdulhakim Haji FAQI

TITLE : Minister of Defense

ON BEHALF OF THE GOVERNMENT OF THE REPUBLIC OF TURKEY

SIGNATURE :

NAME : İsmet YILMAZ

TITLE : Minister of National Defense

**XEER MADAXWAYNAHA Lr. 119** Taariikh: 07/08/2013

Oggolaanshaha Ansaxinta Sharciga Guddiga Madaxabanaan ee Dib U Eegista iyo Hirgelinta Dastuurka

## MADAXWAYNAHA J. F. S

**Markuu arkay:** Qodobka 87aad, Xarafka "C" iyo Qodobka 90aad, Faqradda 6aad ee Dastuurka J.F.S.

**Markuu arkay:** Warqadda Guddoomiyaha Golaha Shacabka Lr. 618-XG-O8-13 ee 05/08/2013 kuna saabsan ansaxinta Golaha Shacabka ee Sharciga Guddiga Madaxa banaan Dib u Eegista Dastuurka.

**Isaga oo Tixgelinaayo** : in loo baahan yahay in Dastuurka dardar la geliyo si ay Ummadda ugu la wareegto Afti Guud.

Wuxuu Soo saaray

Qodobka 1aad

laga bilaabo Maalinta uu Madaxwaynaha Jamhuuriyadda Soomaaliya Saxiixo Xeerkaan, waxuu Madaxwaynaha oggoladay Ansaxinta Sharciga Guddiga Madaxabanaan ee Dib u eegista Dastuurka.

Qodobka 2aad.

Wuxuu Xeerkan dhaqangelayaa maalinta uu Madaxweynaha Saxiixo waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ee Jamhuuriyadda Soomaaliya.

**MUQDISHO 07/08/2013**

XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
WAA LA DIWAAN GELIYAY
DIWAAN NO.
TAARIIKH
SAXIIXA NO.

**Madaxwaynaha J.F.S**
**Mudane Xasan Sheekh Maxamuud**

Republic of Somalia
Office of the President

# JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

## GOLAHASHACABKA

# SHARCIGA GUDDIGA MADAXBANNAAN EE DIB-UEEGISTA IYO HIRGELINTA DASTUURKA

Taariikhda la-Ansixiyay

3 Luulyo 2013

**Tusmo**


Qodobka 1aad: Fasiraad Erayada ....................................................
Qodobka 2aad: Ujeeddada Sharciga ...............................................
Qodobka 3aad: Mabaadi'da Guud ....................................................
Qodobka 4aad: Tirada Xubnaha Guddiga ..........................................
Qodobka 5aad: Xarunta Guddiga ....................................................
Qodobka 6aad: Qaab-dhismeedka Guddiga .......................................
Qodobka 7aad: Go'aan-gaarista Guddiga ..........................................
Qodobka 8aad: Xilka Guddoomiyaha Guddiga ..................................
Qodobka 9aad: Xilka Guddoomiye ku-xigeenka ..................................
Qodobka 10aad: Habraaca Magacaabidda Guddiga .............................
Qodobka 11aad: Shuruudaha Xubnaha Guddiga .................................
Qodobka 12aad: Waajibaadka Guddiga ...........................................
Qodobka 13aad: Muddada Xil-haynta Guddiga .................................
Qodobka 14aad: Waayidda Xubinnimada Guddiga .............................
Qodobka 15aad: Bedelidda xubnaha Guddiga ...................................
Qodobka 16aad: Gacan-siinta Guddiga ...........................................
Qodobka 17aad: Miisaaniyadda Guddiga .........................................
Qodobka 18aad: Xuquuqda iyo Dheefsiinta Guddiga .........................
Qodobka 19aad: Qorshe Hawleedka Guddiga ....................................
Qodobka 20aad: Raad-reebka Sharcigan ..........................................
Qodobka 21aad: Dhaqangalka Sharcigaan ........................................

**Qodobka 1aad: Fasiraad Erayada**

Ereyada hoos ku qoran, waxaa sharcigan dhexdiisa loola jeedaa mid walba fasiraaadda ku hor qoran:-

1. *Dastuurka*: Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya oo sida ku meel gaarka ah loo ansixiyay.
2. *Dawlad*: Waxaa loola jeedaa Dawladda Dhexe, Dowlad Gobaleedyada iyo dowladaha Hoose
3. *Guddiga*: Guddiga Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dasturka ee Madaxa-banaan
4. *Guddiga*: Guddiga Baarlamaanka ee La socodka, Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka
5. *Jamhuuriyadda*: Jamhuuriyadda Federalka Soomaaliya
6. *Madaxweynaha*: Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
7. *Wasiirka u xilsaaran* : Wasiirka Garsoorka, Arrimaha Diinta iyo Awqaafta, Dastuurka, Arrimaha Federaalka iyo Dib-u-heshiisiinta

**Qodobka 2aad: Ujeeddada Sharciga**

Waxaa sharcigan lagu dhisay Guddiga Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka ee Madaxabannaan oo loo xilsaarayo hawlaha Dib-u-eegista iyo dhammaystirka Dastuurka sida ku xusan Qodobada.133 iyo 134aad ee Dastuurka.

**Qodobka 3aad: Mabaadi'da Guud**

Guddigani inta uu ku gudo-jiro fulinta xilkiisa waxaa saldhig u ah, dhowrayaana mabaadi'da guud ee hoos ku xusan:-

1. Ilaha iyo Maqaasida Shareecadda Islaamka;
2. Midnimada iyo wadajirka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;
3. Mabaadi'da iyo afkaarta Dimoqraadiyadda;
4. Nidaamka Federaalka ah; iyo
5. Talooyinka uu soo jeediyay Golahii Ansixinta ee Dastuurka.

**Qodobka 4aad: Tirada Xubnaha Guddiga**

1.Tirada xubnaha Guddiga Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka, waxay noqonaysaa 5(Shan), sida ku xusan Qodobka.134 (2) ee Dastuurka;

2.Dowlad Gobaleedyada soo buuxiyaa Sharuudaha ku xusan Qodobka.49 (5) iyo (6) iyo Qodobada 134 (2) ee Dasturka waxay soo magacaabanayaan hal ergay.

**Qodobka 5aad: Xarunta Guddiga**

Xarunta Guddigu waa Caasimadda dalka ee Muqdisho.

Guddigu wuxuu yeelanayaa qaab-dhismeedka hoos ku qoran:

**Qodobka 6aad: Qaab-dhismeedka Guddiga**

1. Guddoomiye, Guddoomiye ku-xigeenka iyo Xubno;
2. Agaasin Maamuled, Waaxyo iyo hawl-wadeeno ku haboon hawsha Guddiga hortala
3. Gudigu wuxu adeegsan karaa, haddii loo baahdo, khubaro/xeel-dheerayaal ah oo gacan ka siiya gudashada xilkooda.

### Qodobka 7aad: Go'aan-gaarista Guddiga

Fadhiyada Guddigu waxay ku ansaxayaan 2/3 (Saddex meelood labo meel) xubnaha guud ee Guddiga, wuxuuna go'aankoodu ku ansaxayaa cod hal-dheeri ah

### Qodobka 8aad: Xilka Guddoomiyaha Guddiga

Guddomiyaha guddiga wuxuu yeelanayaa xilalka soo socda:

1. Wuxuu mas'uul ka yahay habsami-u-socodka qorshe-hawleedka Guddiga;
2. Wuxuu isugu yeerarayaa, guddoominayaana kulamada Guddiga;
3. Wuxuu mas'uul ka yahay xiriirka iyo wada-shaqaynta Guddiga iyo Hay'adaha kale ee Dawladda.

### Qodobka 9aad: Xilka Guddoomiye ku-xigeenka

1. Wuxuu buuxinayaa kaalinta Guddoomiyaha marka uu maqan yahay.
2. Wuxuu qabanayaa hawlaha hadba uu Guddoomiyuhu u wakiisho.

### Qodobka 10aad: Habraaca Magacaabidda Guddiga

1. Sida ku cad Qodobka 134 (2) Golaha Wasiiradu waxay diyaarinayaan liiska musharaxiinta ka mid noqonaya Guddiga ;
2. Wasiirka u xilsaaran wuxuu todoba(7) maalmood gudahooda ka soo xulayaa liiska ku xusan faq.1aad ee Qodobkan xubno shan ah;
3. Ra'iisul Wasaaruhu wuxuu soo hordhigayaa Baarlamaanka Federaalka magacyada xubnaha la soo xulay muddo 15 maalmood gudahood;
4. Baarlamaanka Federaalka wuxuu 14 maalmood gudahood ku ogolaanayaa ama ku diidayaa dhammaan xubnaha la soo xulay ama mid ama ka badan marka la horkeeno sida ku xusan faq.(2) ee Qodobkan;
5. Haddii Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya uu diido xubin la soo magacaabay, wasiirka ay khuseyso waxa uu soo bedalayaa xubintaas 14 cisho gudahooda si waafaqsan faq.2aad ee Qodobkan.

### Qodobka 11aad: Shuruudaha Xubnaha Guddiga

Xubin kasta oo loo magacaabayo Guddigan waa in ay buuxisaa shuruudaha soo socda ee ku xusan Qodobka 134aad ee Dastuurka :

a) Anshax iyo sumcad Wanaagsan;
b) Haysasho Shahaado jaamacadeed oo la aqoonsan yahay;
c) Leh khibrad heer sare ee dhinaca maamulka ama ku shaqeynta sharciga;
d) Inuu u leeyahay aqoon iyo khibrad ay ku dheehan tahay sumcad wanaagsan ugu yaran toban (10) sano oo la xirirta arimaha hoos ku qoran:-
   1. Sharciga
   2. Maamulka Guud
   3. Dhaqaalaha iyo
   4. Xuquuqda Aadanaha
e) Inuu leeyahay waaya-aragnimo la xiriirto sharci qorista

### Qodobka 12aad: Waajibaadka Guddiga

Waajibaadka Guddiga waxay noqonayaan kuwa soo socda:

1. Guddiga La socodka Dasturka ee Baarlamanka aya tilmaamid guud ku leh Guddiga

Dib -u-eegista si waafaqsan Qodobadaan 133 (2b iyo 5) iyo 134 (7) ee Dastuurka.

2. Warbixin siiyo Guddiga La socodka ee Baarlamaanka saddexdii biloodba mar, ama hadba sida uu Guddiga La socodka ee Baarlamaanka ka codsado.
3. Maxkamdda Dastuurka waxay iyaduna ku yeelanaysaa Guddiga talo bixin shardiyeed si loo xaqiijiyo waafaqsanaanta dastuuriga ee la xiriirta talooyinka uu u soo gudbinayo Guddiga La socodka Baarlamaanka si waafaqsan Qodobka 134 (7) (f) ee Dastuurka.

**Qodobka 13aad: Muddada Xil-haynta Guddiga**

1. Guddiga waxa la magacaabayaa isla muddo xiliyeedka Baarlamaanka Federaalka gudihiisa ee 4ta sano ah, oo dhamaanaysa bisha August 2016.
2. Mar haddii Dastuurka uu ansixiyo Baarlamaanka Federaalka sida ku xusan Qodobka 136(1) ee Dastuurka, Guddigan jiritaankiisa wuu dhammanayaa.

**Qodobka 14aad: Waayidda Xubinnimada Guddiga**

Xubinimada Guddiga waxaa lagu waayi karaa haddii ay dhacdo mid ka mid ah arimaha soo socda:

1. Istiqaalo qoraal ah;
2. Geeri;
3. In Guddigu talaabo anshaxeed kama dambeys ah ka qaado;
4. Go'aan Maxkamadeed oo kama dambays ah oo ku saabsan fal dambiyeed uu galay xubintaas;
5. Sababo Caafimaad awgeed oo uu xilkiisa u gudan waayo.

**Qodobka 15aad: Bedelidda xubnaha Guddiga**

Hadii ay dhacdo in la lumiyo xubinnimada guddiga sida uu tilmaamayo Qodobka 14 ee isla shardigaan ama xubinta gudan wayso waajibaadka iyo mas'uuliyadda shaqo, Guddiga La socodka ee Baarlamaanka wuxuu talo siinayaa Wasaaradda ku shaqada leh in ay soo bedesho xubintaas ama xubnahaas iyadoo xubinta cusub ee la soo magacaabayo loo raacayo si waafaqsan Qodobka 10 ee sharcigaan.

**Qodobka 16aad: Gacan-siinta Guddiga**

Guddigu wuxuu waydiisan karaa hay'adaha dawladda iyo ururada bulshada talooyiin iyo gacansiin si uu u guto masuuliyadiisa iyo waajibaadkiisa shaqo oo loo arko lagama maarmaan, ama haddii Guddiga La socodka ee Baarlamaanka uu ku tala bixiyo sidaas.

**Qodobka 17aad: Miisaaniyadda Guddiga**

1. Gudigu wuxu yeelanayaa miisaaniyad u gaar ah oo ka mid ahaanaysa miisaniyada guud ee Qaranka si waafaqsan Qodobka. 110 (4) ee Dastuurka;
2. Guddiga wuxu u madaxbannan yahay maamulida miisaaniyadda loo qoondeeyay si waafaqsan shuruucda maaliyadda ee maamulka dawladda;

**Qodobka 18aad: Xuquuqda iyo Dheefsiinta Guddiga**

1. Xubnaha Guddiga waxay xaq u yeelanayaan gunno bileed si waafaqsan habraacyada ay Xukuumaddu Federaalka u dejin doonto;
2. Xubnaha Guddiga waxa la siinayaa gunno safar, mar alaale markii safar

shaqo la xiriira hawshooda ay aadayaan;

3. Guddi wuxuu yeelanayaa bil fasax sanadkiiba.

### Qodobka 19aad: Qorshe Hawleedka Guddiga

Guddiga wuxuu diyaarinayaa qorsha hawleed dhameystiran isagoo la tashanaya ogolaanshana ka dalbanaya Guddiga La socodka ee Baarlamaanka muddo aan ka badneyn 30 maalmood gudohooda kadib markii la dhiso.

### Qodobka 20aad: Raad-reebka Sharcigan

Mar hadii sharcigaan uu dhaqangalo, hay' ad kasta oo qaanuuni ah oo jirta iyo shuruucda ka horimaanaysa sharcigan waa la baabi'iyay .

### Qodobka 21aad: Dhaqangalka Sharcigaan

Sharcigaan wuxuu dhaqangelayaa marka uu Baarlamaanka ansixiyo, uuna saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, laguna soo saara Faafinta Rasmiga ee Dawladda.

**XEER MADAXWAYNAHA Lr. 113** Taariikh: 05/09/2013

Dallacsiin Sarkaal

**MADAXWAYNAHA J. F. S**

| | |
|---|---|
| **Marka uu arkay:** | Qodobka 87, Xarafk' C" iyo Qodobka 90, Xarafka ' B ee Dastuurka Federaalka KMG. |
| **Marka uu arkay:** | Xeer Lr. 2 ee soo baxay 23/12/1972 kuna saabsan Dhismaha Ciidanka Booliska iyo Xeer Lr. 14 ee soo baxay 04/01/1973 kuna saabsan Nidaamka Ciidanka Booliska. |
| **Marka uu Tixgeliyay:** | Soo jeedinta Taliyaha Ciidanka Booliska Soomaaliyeed ee XOG/11-154/13. taariikh 31/09/2013 kuna saabsan soo jeedin dallacaad. |

Waxa uu soo saaray Xeerkaan

Qodobka 1aad

Laga bilaabo maalinta uu Madaxweynuhu saxiixo Xeerkaan, waxaa loo dallacsiiyay:

1. G/Le Sare Dr. Saciid Axmed Kadiye darajada S/Guuto
2. G/Le Sare Eng. Bashiir Cabdi Maxamed darajada S/Guuto

Qodobka 2aad

Waxa uu Xeerkaan dhaqangelayaa markii uu Madaxweynuhu saxiixo waxaana lagu soo daabacayaa Faafinta Rasmiga ee Jamhuuriyadda Soomaaliya.

MUQDISHO 05/09/2013

XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
WAA LA DIWAAN GELIYEY
DIWAAN NO. HAW/DEK/003/13
TAARIIKH 6/11/2013
SAXIIKA NO.

Madaxwaynaha
Mudane Xasan Sheekh Maxamuud

Republic of Somalia Office of the President

**XEER MADAXWAYNAHA Lr. 114** Taariikh: 07/09/2013

Oggolaanshaha Heshiiska Cotonou

## MADAXWAYNAHA J. F. S

**Marka uu arkay:** Qodobka 87, Xarafka' C" iyo Qodobka 90, Xarafka ' F' Dastuurka J.F.S.

**Marka uu arkay:** Warqadda Guddoonka Golalaha Shacabka Lr. 617-XG-08-13 ee 05/08/2013 kuna saabsan soo gudbinta Ansaxinta Golaha Shacabka ee Heshiiskii COTONOU

Marka uu Tixgeliyay: In loo baahan yahay inay J.F.S. ka muuqato Ururada Caalamiga iyo Goboleedka si ay u gudato xilka ka saaran iyo dowrka ay ku leedahay Iskaashiga Dowladaha Caalamka iyada oo la dhowrayo danaha Shacabka Soomaayeed.

Wuxuu soo saaray Xeerkaan

Qodobka 1aad

Laga bilaabo maanta uu Madexwaynaha J.F.S. saxiixo Xeerkaan waxaa la oggolaaday Heshiiska uu soo ansixiyay Golaha Shacabka ee J.F.S.

Qodobka 2aad

Waxaa Xeerkaan lagu baabi'iyay wixii sharci iyo xeer ah ka hor imaanayo Sharcigan.

Qodobka 3aad

Waxa uu Xeerkaan dhaqangelayaa maalinta uu Madaxweynuhu saxiixo waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ee Jamhuuriyadda Soomaaliya.

**Muqdisho, 07/09/2013**

**Madaxwaynaha J.F.S.**
**Mudane Xasan Sheekh Maxamuud**

XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
WAA LA DIWAAN GELIYAY
DIWAAN NO. HAW/DEK/00031/13
TAARIIKH 6/11/2013
SAXIIXA NO.

Republic of Somalia
Office of the President

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA
SOOMAALIYA GOLAHASHACABKA

# Heshiiska Cotonou

Taariikhda la Ansixiyay

24 Luulyo 2013

# GOLAHA SHACABKA

## HINDISE LA XIRIIRA GO'AANKA BAARLAMAANKU KU GAARAY IN AWOOD LOO SIIYO DOWLADDA IN AY KAYDISO GO'AANKII KA MID NOQOSHADA HESHIISKII 'COTONOU'

Iyadoo la tixraacayo Qodobka 94 ee Heshiiksii Cotonou

### GOLAHA SHACABKA

**Markii uu Arkay**: in Heshiiska Cotonou uu yahay heshiiska ugu ballaaran ee iskaashi ka dhexeeya dalalka soo koraya iyo Midowga Yurub;

**Iyadoo**: Soomaaliya ay ka mid tahay saxiixayaashii heshiiskii Mabda'iga ahaa ee Lome oo Dalalka Africa-Caribbean-Pacific (ACP) iyo Midowga Yurub (EU) iyo Heshiiskii Georgetown, kaasoo lagu aassaasay 79-ka xubnood ee Dawaladaha ACP;

**Iyadoo la garwaaqsaday:** in xilligii xasillooni darrada dalka ka jirtay awgeed loo waayey Dawlad Dhexe oo haysata aqoonsi caalami ah, sababahaas awgoodna ay Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ugu suurtogeliweydey in ay saxiixdo 00 ansixisana Heshiiska Cotonou;

**Iyadoo**: xogogaal loo noqday in 25-kii February 2013, ay Dawladda Federaalka ee Soomaaliya ay u gudbisay codsi ka mid noqoshada heshiiska Cotonou loo oggolaado si waafaqsan Qoddobka 94 ee Heshiiska Cotonou;

**Iyadoo**: sidoo kale Xog-ogaal loo noqday in Golaha Wasiirada ee Dalalka (ACP) iyo Midowga Yurub (EU) soo dhoweeyey, ansixiyeenna codsigii Soomaaliya ee kor ku xusan;

**Sidaas Awgeed**: Golaha Shacabka oo isugu yimid xaruntiisa Caasimadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ee Muqdisho Kalfadhigii 1aad ee aan Caadiga aheyn fadhigiisii 13aad taariikhduna aheyd 24kii July 2013 wuxuu guddoonsaday ansixiyeyna sidan soo socota:

(1) In Dawladda Federaalka Soomaaliya awood loo siiyo in ay ka mid noqoto Heshiiska Cotonou iyo in ay ku kaydiso Go'aankan Xoghaynta Guud ee Golaha Midowga Yurub (EU) iyo Xoghaynta dalalka ACP, kuwan oo u igman Kaydinta Heshiiskan;

(2) In iyadoo la raacayo qaabka iyo nidaamka Heshiiska Cotonou, ay Dawladda Federaalka ee Soomaaliya ay u heellan tahay iskaashiga iyo wada hadalka:

b) Dawlad Wanaagga;

t) Xuquuqda Aadanaha

j) Mabaadii'da Diimuqraadiyadda iyo sarreynta sharciga, iyo

x) In ay daneyneyso ka qeybqaadashada kulanka kawada xaajoodka Deeqda Sanduuqa Horumarinta ee Yurub Wareeggiisa 11aad.

Golaha Shacabka wuxuu ku ansixiyey magaalada Muqdisho maalinta 24kii bisha July sanadka 2013 cod aqlabiyad 169 iyadoo aysan jirin wax diiday iyo wax ka aamusay.

Sidaas daraadeed, wuxuu Golaha Shacabka Federaalka Soomaaliya go'aankan u gudbiyey Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya si uu uga guto waajibkiisa ku xusan Qodobka 90aad (q) ee Dastuurka Federaalka Soomaaliya.

M.ne Muxammad Sh. Cusmaan Jawaari

**Guddoomiyaha Baarlamaanka**

THE HOUSE OF THE PEOPLE

# MOTION FOR A RESOLUTION OF PARLIAMENT SEEKING TO AUTHORISE THE GOVERNMNENT OF SOMLIA TO DEPOSIT THE RESOLUTION OF ACCESSION TO THE COTONOU AGREEMENT

**Pursuant to Article 94 of the Cotonou Agreement**

Whereas the Cotonou Agreement is the most comprehensive partnership
agreement between developing countries and the EU;

Whereas the Federal Republic of Somalia is a signatory to the ACP-EU Lome Convention and the 1975 Georgetown Agreement, which founded the 79 member ACP Group of States;

Mindful that due to years of turbulence and lack of an internationally recognized government, the Federal Republic of Somalia could not ratify the Cotonou Agreement;

Aware that on 25th February 2013, the Federal Republic of Somalia presented a request for accession in accordance with Article 94 of the Cotonou Agreement;

Further aware that the ACP-EU Council of Ministers has approved the request for accession;

Now therefore, be it resolved by the House of the People, convened, constituted and sitting in Mogadishu this extraordinary session in its 13th meeting on the day of 24th July 2013, as follows:

(1) That the Government of Somalia is authorized to accede to the Cotonou Agreement and to deposit this Resolution with the Secretariat General of the Council of the European Union and the Secretariat of the ACP States, Depositaries of the Agreement;

(2) That under the framework of the Cotonou Agreement, the Federal Republic of Somalia commits itself to cooperation and dialogue in:

a) Good governance;
b) Human rights
c) Democratic principles and the rule of law, and
d) Seeking access to the 11th Round of the European Development Fund.

Signed in Mogadishu on 24th July 2013 by the House of the People with a vote of 169 for, 0 against and 0 abstained.

In that respect the House of the People forwards herewith to the President of the Federal Republic of Somalia in order to carry out his duty as stated in Article 90 (q) in the Provisional Constitution of Somalia.

Hon. Mohammad Sheikh Osman Jawari
Speaker of the House

**XEER MADAXWAYNAHA Lr. 117** Taariikh: 29/09/2013

Dib ula wareegid Dhul danguud

**MADAXWAYNAHA J. F. S**

| | |
|---|---|
| **Markuu arkay:** | Qodobka 87, Xarafaha 'b' iyo 'c' iyo Faqrada 2aad ee Dastuurka J.F.S |
| **Markuu arkay:** | Qodobka 97, Faqrada 1aad iyo Qodobka 100aad Xarfaha A iyo D ee Dastuurka KMG |
| Markuu arkay: | Warqadda Lr. WAG&AQ/XW/00430/13 ee soo baxday 29/09/2013 kuna saabsan soo jeedinta Wasiirka Arrimaha Gudaha & Amniga Qaranka. |
| Markuu Tixgeliyay: | In loo baahan yahay in la sugo Nabadgelyada Garoonka Diyaaradaha Caalamiga ah Aaden Cadde. |
| Markuu Tixgeliyay: | In loo qabo baahi aad u weyn in la sugo nabadgelyada dalka guud ahaan, gaar ahaana Gobolka Benaadir. |

Wuxuu soo saaray Xeerkaan

Qodobka 1aad

Laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 29/09/2013 wuxuu Madexwaynaha soo saaray Xeer dib lagula wareegaayo dhulalka ku yaalla Waddada iyo Agagaarka Garoonka Diyaaradaha Caalamiga ee Aaden Cadde kuwaasi oo ay horey u laheyd Dowladda Soomaaliyeed. Waxay Dowladda Soomaaliyeed si qasab ah dib ugula wareegaysaa si Danguud ee Qaran sida uu qabo Qodobka 26aad, Faqrada 2aad ee Dastuurka KMG.

Qodobka 2aad

Wuxuu Xeerkaan farayaa Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Amniga Qaranka, bacdamaa uu xil weyn ka saaran yahay Nabadgelyada iyo xasiloonada gudaha Dalka, inay Toban cisho gudahood uga saarto dadka deggan dhulalkaasi si loo sugo ammaanka Garoonka Diyaaradaha Caalamiga ee Aadan Cadde iyo guud ahaan Gobolka Benaadir.

Qodobka 3aad

Waxa uu Xeerkaan dhaqangelayaa isla markuu saxiixo Madaxweynaha J.F.S waxaana lagu soo daabaci doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

**Muqdisho, 29/09/2013**

XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
WAALADWAAHEEDAYA
DIWAAN NO
TAARIIKH
SAXIIXA NO

Madaxweynaha
Mudane Xasan

**PRESIDENTIAL DECREE No. 107** DATE: 01/10/2013

APPOINTMENT OF A PRESIDENTIAL SENIOR LEGAL ADVISER ON INTERNATIONAL LAW

## THE PRESIDENT OF THE FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

**Having seen:** Article 90 and article 87, Paragraph 2 of the Constitution of the FRS

**Having considered:** The need for appointing Senior Legal Adviser on International Law

**Having viewed:** The knowledge and the experience of the appointee.

### HAS DECREED THE FOLLOWING:

### Article 1

From Today the 1st of October 2013, the President has appointed Ms. Mona Al-Sharmani as the Presidential Senior Legal Adviser on International Law.

### Article 2

This decree takes effect when the President of the Republic of Somalia signs it and shall be published in the Official Journal of FRS.

**MOGADISHO 01/10/2013**

XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
WAA LA DIIWAAN GELIYEY
DIIWAAN NO.
TAARIIKH. 31/12/2013
SAXIIXA NO.

Republic of Somalia

Madaxweynaha J. F. S.
Xasan Sheekh Maxamuud

**XEER MADAXWAYNAHA Lr. 120** Taariikh: 23/10/2013

Magacaabid La-Taliyaha Madaxweynaha JFS
Ee Arrimaha Maamul Goboleedyada

**MADAXWAYNAHA J.F.S.,**

| | |
|---|---|
| **Markuu Arkay:** | Qodobka 90 iyo Qodobka 87aad, Farqadda 2aad ee Dastuurka J.F.S. |
| **Markuu Arkay:** | Sharciga Degmooyinka iyo Gobollada Dalka ee soo baxay 06/08/2013. |
| **Markuu Tixgeliyay:** | Baahida loo qabo in la magacaabo La – Taliye Xagga Arrimaha Maamul-Goboleedyada |
| **Markuu Arkay:** | Aqoonta iyo Khibradda mudanaha jagadan loo magacaabayo. |

**Waxa uu soo saaray Xeerkaan:**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo Maanta oo ay taariikhdu tahay 23/10/2013, waxa uu Madaxweynuhu u magacaabay Faarax Maxamuud Jaamac in uu noqdo LA-TALIYAHA MADAXWEYNAHA JFS EE ARRIMAHA MAAMUL-GOBOLEEDYADA

**Qodobka 2aad**

Waxa uu Xeerkan dhaqan-gelayaa markii uu Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa faafinta Rasmiga ah ee JFS.

**MUQDISHO 23/10/2013**

XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
WAA LA DIIWAAN GELIYEY
DIIWAAN NO.
TAARIIKH
SAXIIXA NO.

Madaxweynaha J. F. S.
Mudane Xasan Sheekh Maxamuud

**XEER MADAXWAYNAHA Lr. 122** Taariikh: 06/10/2013

Magacaabid La-Taliyaha Madaxweynaha JFS ee Xagga ka hortagga argagixisada

**MADAXWAYNAHA J.S**

**Markuu Arkay:** Qodobka 90, Xarafaha 'b' iyo 'k' ee Dastuurka J.F.S.

**Markuu Arkay:** Qodobka 87aad, Faqradda 2aad ee Dastuurka.

**Markuu Arkay:** Qodobka 126aad, Faqradda 3aad ee Dastuurka.

**Markuu Tixgeliyay:** Baahida loo qabo in la magacaabo La – Taliye Madaxweynaha JFS ee Xagga Ka-Hortagga Argigixisada

**Markuu Arkay:** Aqoonta iyo Khibradda mudanaha jagadan loo magacaabayo.

**Waxa uu soo saaray Xeerkaan:**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo Maanta oo ay taariikhdu tahay 6da Oktoobar 2013, waxa uu Madaxweynuhu u magacaabay mudane Xuseen Sheekh Cali in uu noqdo La-Taliyaha Madaxweynaha JFS ee Xagga ka – Hortagga Argagixisada.

**Qodobka 2aad**

Waxa uu Xeerkan dhaqan-gelayaa marka uu Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa faafinta Rasmiga ah ee JFS.

**MUQDISHO 06/10/2013**

XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
WAA LA DIIWAAN GELIYEY
DIIWAAN NO. [illegible]
TAARIIKH [illegible]
SAXIIXA NO. [illegible]

**Madaxweynaha J. F. S.**
**Maxamed Xasan Sheekh Maxamuud**

**XEER MADAXWAYNAHA Lr. 124** Taariikh: 04/11/2013

Oggolaansho Dil Toogasho

**MADAXWAYNAHA J.S**

| | |
|---|---|
| **Markuu Arkay:** | Qodobka 87, Xarafka 'C' iyo Qodobka 90aad, Faqradda1 6aad Dastuurka J.F.S. |
| **Markuu Arkay:** | Xeer Madaxweyne Lr. 6 ee soo baxay 30/10/1969 kuna saabsan Habka Dilka Dembiilaha ay xukuntay Maxkamadda Ciidamada. |
| **Markuu Arkay:** | Codsiga Xeer-Ilaaliyaha Maxkamadda Ciidamada Qalabka Sida Lr/XG/MCQS/2-504/2013 ee 12/10/2013 wuxuuna Xeer-ilaaliyaha Maxkamadda CQS codsanayaa in lagu fuliyo Dil Toogasho L/X/le Xoogga Dalka Yaxye Sheekh Cabdullaahi Axmed, 33 jir ah ina Xabiibo Maxamed ku dhashay Xamar iyo Xuseen Cali Axmed, 37 jir ah ina Aamino Muudey, ku dhashay Balcad. |
| **Markuu Arkay:** | Xukunka Maxkamadda Sare ee CQS Lr. MS/CQS/0113/13 ee 28/09/2013 xukunkaasi ee ku saabsan Dil Dhimasho gaystay. |
| **Markuu Arkay:** | Qodobada 1aad iyo 2aad ee Sharciga Lr. 30 ee 31/03/1964 iyo Qodobada 109-110 XCS iyo Qodobada 163,202,120,120-123 XHCS. |
| **Markuu Tixgeliyay:** | In loo baahan yahay in la badbaadiyo Dadweynaha Soomaaliyeed bacdamaa ay waajib ku tahay in la badbaadiyo Nolosha Dadka Soomaaliyeed iyada oo la dhawraayo inuu qof kasto xaq u leeyahay nolol, sida uu qabo Qodobka 13aad ee Dastuurka J.F.S. |

**Wuxuu soo saaray Xeerkaan**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo Maalinta uu Madaxweynaha saxiixo Xeerkaan ku saabsan Dil-Toogasho wuxuuna oggolaaday in lagu fuliyo Dil Toogasho Gacan ku dhiiglayaasha kala ah: 1. Yaxye Sheekh Cabdullaahi Axmed iyo 2. Xuseen Cali Axmed oo si bareer ah u dileen Marxuumiinta kala ah: Ex-L/A Bol.

Aadan Nuur Cali iyo D/le Bol. Cali Muumin Cabdiraxmaan oo labaduba ka tirsanaan jireen Ciidanka Booliiska, gaar ahaan Birmadka Booliiska.

### Qodobka 2aad

Waxaa Xeer-ilaalinta iyo Maxkamadda Ciidamada Qalabka sida la farayaa inay Galalkooda u gudbiyaan Wasaaradda Arrimaha Gudaha & Amniga iyo Wasaaradda Gaashaandhigga sida uu qabo Xeerka Lr. 6 ee soo baxay 30/10/1969.

### Qodobka 3aad

Wuxuu Xeerkaan Dhaqan-gelayaa maalinta uu Madaxwaynaha saxiixo waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyada Soomaaliya.

**MUQDISHO 04/11/2013**

XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
WAA LA DIIWAAN GELIYEY
DIIWAAN NO. HAN/00039/13
TAARIIKH 24/12/2013
SAXIIXA

Madaxweynaha J. F. S.
Xasan Sheekh Maxamuud

**XEER MADAXWAYNAHA Lr. 125** Taariikh: 09/11/2013

Magacaabid Garsoorayaal Maxkamadda CQS

**MADAXWAYNAHA J.S**

**Markuu Arkay:** Qodobka 87, Xarafka 'b' iyo 'c' ee Dastuurka J.F.S.

**Markuu Arkay:** Xeerka Lr. 15 ee soo baxay 6da Abriil 1960 kuna saabsan Dhismaha Xoogga Dalka Soomaaliyeed.

**Markuu Arkay:** Soo jeedinta Guddoomiyaha Maxkamadda Sare ee ku saabsan in Maxkamadda Darajada Koowaad loo ciidameeyo Garsoorayaal Lr. MS/56/013 ee 28/10/2013.

**Markuu Tixgeliyay:** Inay u leeyihiin aqoon dhinaca Qaanunka iyo Shareecada

**Wuxuu soo saaray Xeerkaan**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo Maanta oo ay taariikhdu tahay 09/11/2013 waxaa loo ciidameeyay looguna magacaabay Garsoorayaal Maxkamadda Darajada Koowaad ee Ciidamada Qalabka Sida:

1. Cabdi Baari Aadan Axmed Ibraahim
2. Xuseen Cabdi Axmed Rooble
3. Maxamuud Maxamed Iidow Cusmaan

**Qodobka 2aad**

Waxaa isla Xeerkaan lagu caddeynayaa in lagu qaatay darajada **labo Xiddigle** bacdamaa ay yihiin Jaamiciyiin waxaana Wasaaradda Gaashaandhigga la farayaa inay si degdeg ah u diiwaangeliyaan 3$^{da}$ Sarkaal.

**Qodobka 3aad**

Wuxuu Xeerkaan Dhaqan-gelayaa isla maalinta uu Madaxwaynuhu saxiixo waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya.

**MUQDISHO 09/11/2013**

Madaxweynaha J. F. S.
Mudane Xasan Sheekh Maxamuud

**XEER MADAXWAYNAHA Lr. 126** Taariikh: 12/11/2013

Magacaabid Nootaayo

**MADAXWAYNAHA J.S**

| | |
|---|---|
| **MARKUU ARKAY:** | Qodobka 87, Farqadda 1aad, Xarafka 'C' iyo Farqadda 2aad ee Dastuurka J.F.S. |
| **MARKUU ARKAY:** | Xeerka Lr. 1 ee soo baxay 02/03/1962 kuna saabsan hawlaha Nootaayaha |
| **MARKUU ARKAY:** | Xeerka Lr. 7 ee soo baxay 02/02/1986 oo awood u siinaayo Madaxweynaha inuu magacaabo Nootaayaha |
| **MARKUU ARKAY:** | Soo jeedinta Wasiirka Garsoorka, Arrimaha Diinta iyo Dastuurka, Warqad Lr. WGAAD/XW/E-12/78/2012 ee 25/02/2013 |

**Wuxuu Madaxweynaha soo saaray Xeerkaan**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo, waxaa **Dr. Axmed Ciise Cabdullaahi** loo magacaabay inuu noqdo Nootaayo.

**Qodobka 2aad**

Waxa uu **Dr. Axmed Ciise Cabdullaahi** ka hawlgelayaa Gobolka Benaadir, gaar ahaan magaalada Muqdisho.

**Qodobka 3aad**

Waxa uu Xeerkaan Dhaqan-gelayaa isla maalinta uu Madaxwaynaha J.F.S. saxiixo waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

**MUQDISHO 12/11/2013**

XAFISKA HANTIDHAWRKA GUUD
WAA LA DIIWAANGELIYEY
DIIWAANKA NO. HAN/CC/4/13
TAARIIKH 3/12/2013
SAXIIXA

**Madaxweynaha J. F. S.**
**Mudane Xasan Sheekh Maxamuud**

**XEER MADAXWAYNAHA Lr. 127** Taariikh: 12/11/2013

Magacaabid Nootaayo

**MADAXWAYNAHA J.S**

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 87, Faqradda 1aad, Xarafka 'C' iyo Faqradda 2aad ee Dastuurka J.F.S.

**MARKUU ARKAY:** Xeerka Lr. 1 ee soo baxay 02/03/1962 kuna saabsan hawlaha Nootaayaha

**MARKUU ARKAY:** Xeerka Lr. 7 ee soo baxay 02/02/1986 oo awood u siinaayo Madaxweynaha inuu magacaabo Nootaayaha

**MARKUU ARKAY:** Soo jeedinta Wasiirka Garsoorka, Arrimaha Diinta iyo Dastuurka, Warqad Lr. WGAAD/XW/D-448/2012 ee soo baxday 18/08/2012

**Wuxuu Madaxweynuhu soo saaray Xeerkaan**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo, waxaa **Dr. Cumar Maxamed Faarax** loo magacaabay inuu noqdo Nootaayo.

**Qodobka 2aad**

Waxa uu **Dr. Cumar Maxamed Faarax** ka hawlgelayaa Gobolka Benaadir, gaar ahaan magaalada Muqdisho.

**Qodobka 3aad**

Waxa uu Xeerkaan Dhaqan-gelayaa isla maalinta uu Madaxwaynaha J.F.S. uu saxiixo waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

**MUQDISHO 12/11/2013**

XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
WAA LA DIIWAAN GELIYEY
DIIWAAN NO. 
TAARIIKH 
SAXIIXA 

**Madaxweynaha J. F. S.**
**Xasan Sheekh Maxamuud**

**XEER MADAXWAYNAHA Lr. 128** Taariikh: 16/11/2013

Magacaabid Taliyaha Ciidanka Badda

**MADAXWAYNAHA J. F. S**

| | |
|---|---|
| **Markuu arkay:** | Qodobka 87, Faqradda 1aad, Xuruufta 'a', 'b', iyo 'c' iyo Faqradda 2aad ee Dastuurka J.F.S. |
| **Markuu arkay:** | Qodobka 90aad, Xuruufta 'b' iyo 'c' ee Dastuurka J.F.S |
| **Markuu arkay:** | Warqadda Wasiirka Gaashaandhigga lr. WG/00701/13 ee 07/11/2013 kuna saabsan soojeedinta ah in la magacaabo Taliyaha Ciidanka Badda |
| **Markuu arkay:** | Sharciga Lr. 15 ee soo baxay 06/04/1960 ee lagu dhisay Xoogga Dalka Soomaaliyeed. |
| **Markuu arkay:** | Soo jeedinta Taliyaha Ciidamada Xoogga Dalka Soomaaliyeed Lr. N. T1/1107/13 ee 06/11/2013. |
| **Markuu arkay:** | Inay muhiim tahay in la magacaabo Taliye Ciidanka Badda Soomaaliyeed. |

**Wuxuu soo saaray Xeerkaan**

**Qodobka 1aad**

Waxaa Xeerkaan lagu magacaabay inuu noqdo S/Guuto **Madeey Nuurey Sheekh Xasan (Ufurow)** Taliyaha Ciidanka Badda Soomaaliyeed.

**Qodobka 2aad**

Waxaa Xeerkaan lagu baabi'iyay sharci ama xeer kasta oo ka horimaanaayo.

**Qodobka 3aad**

Waxa uu Xeerkaan dhaqan-gelayaa markii uu Madaxwaynaha Jamhuuriyada Soomaaliya uu saxiixo waxaana lagu soo daabicayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed.

**MUQDISHO 16/11/2013**

XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
WAA LA DIIWAAN GELIYEY
DIIWAAN NO. HAN/00042/13
TAARIIKH: 24/12/2013
SAXIIXA: 

Madaxwaynaha J. F. S.
Xasan Sheekh Maxamuud

Magacaabid Gudoomiyaha Hay'adda Cilmi
Baarista Badaha Soomaaliyeed

**MADAXWAYNAHA J. F. S**

**Markuu arkay:** Qodobka 87, Faqradda 1aad, Xuruufta 'a', 'b', iyo 'c' iyo Faqradda 2aad ee Dastuurka J.F.S.

**Markuu arkay:** Qodobka 90aad, Xuruufta 'b' iyo 'c' ee Dastuurka J.F.S

**Markuu arkay:** Warqadda Wasiirka Gaashaandhigga lr. WG/00701/13 ee 07/11/2013 kuna saabsan soojeedinta ah in la magacaabo Taliyaha Ciidanka Badda

**Markuu arkay:** Sharciga Lr. 15 ee soo baxay 06/04/1960 ee lagu dhisay Xoogga Dalka Soomaaliyeed.

**Markuu arkay:** Soo jeedinta Taliyaha Ciidamada Xoogga Dalka Soomaaliyeed Lr. N. T1/1107/13 ee 06/11/2013.

**Markuu arkay:** Inay muhiim tahay in la magacaabo Gudoomiyaha Hay'adda Cilmi Baarista Badaha Soomaaliyeed.

**Wuxuu soo saaray Xeerkaan**

**Qodobka 1aad**

Waxaa Xeerkaan loogu magacaabay **S/Gaas Faarax Axmed Cumar** inuu noqdo Gudoomiyaha Hay'adda Cilmi Baarista Badaha Soomaaliyeed si uu door wayn uga qaato dardargelinta dhismaha Hay'adda, bacdamaa oo u leeyahay khibrad aad u dheer arrimaha la xiriira badaha Sooomaaliyeed iyo kuwa adduunkaba.

**Qodobka 2aad**

Waxaa Xeerkaan lagu baabi'iyay sharci ama xeer kasta oo ka horimaanaayo.

**Qodobka 3aad**

Waxa uu Xeerkaan dhaqan-gelayaa markii uu Madaxwaynaha Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya uu saxiixo waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee Jamhuuriyadda.

**MUQDISHO 19/11/2013**

**Madaxwaynaha J. F. S.**
**Xasan Sheekh Maxamuud**

**XEER MADAXWAYNAHA Lr. 130** Taariikh: 21/11/2013

## Magacaabid La taliyaha Madaxweynaha JFS ee Arrimaha Gobollada

### MADAXWAYNAHA J. F. S

| | |
|---|---|
| **Markuu arkay:** | Qodobka 90 iyo Qodobka 87aad, Farqadda 2aad ee Dastuurka J.F.S. |
| **Markuu arkay:** | Sharciga Degmooyinka iyo Gobollada Dalka ee soo baxay 06/08/2013 |
| **Markuu Tixgeliyay:** | Baahida loo qabo in la magacaabo La Taliye Xagga Arrimaha Gobollada. |
| **Markuu arkay:** | Aqoonta iyo Khibradda Mudanaha Jagada loo Magacaabayo |

### Wuxuu soo saaray Xeerkaan

### Qodobka 1aad

Laga bilaabo Maanta oo ay taariikhdu tahay 21/11/2013 waxa uu Madaxwaynaha u magacaabay Mudane **Cabdi Cali Raage** in uu noqdo LA-TALIYAHA MADAXWEYNAHA JFS EE ARRIMAHA GOBOLLADA

### Qodobka 2aad

Waxa uu Xeerkaan dhaqan-gelayaa markii uu Madaxwaynaha Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliyeed saxiixo waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

**MUQDISHO 21/11/2013**

XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
WAA LA DIIWAAN GELIYEY
DIIWAAN NO
TAARIIKH 24-11-2013
SAXIIXA NO

Madaxweynaha J. F. S.
Mudane Xasan Sheekh Maxamuud

**XEER MADAXWAYNAHA Lr. 131** Taariikh: 24/11/2013

Magacaabid La taliyaha Madaxweynaha JFS ee Arrimaha Bulshada

## MADAXWAYNAHA J. F. S

| | |
|---|---|
| **Markuu arkay:** | Qodobka 90 iyo Qodobka 87aad, Farqadda 2aad ee Dastuurka J.F.S. |
| **Markuu Tixgeliyay:** | Baahida loo qabo in la magacaabo La Taliye Xagga Arrimaha Bulshada. |
| **Markuu arkay:** | Aqoonta iyo Khibradda Mudanaha Jagada loo Magacaabayo |

## Wuxuu soo saaray Xeerkaan

## Qodobka 1aad

Laga bilaabo Maanta oo ay taariikhdu tahay 24/11/2013 waxa uu Madaxwaynuhu u magacaabay Mudane **Yaasiin Maxamuud Jilacow** in uu noqdo LA-TALIYAHA MADAXWEYNAHA JFS EE ARRIMAHA BULSHADA.

## Qodobka 2aad

Waxa uu Xeerkaan dhaqan-gelayaa markii uu Madaxwaynaha Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliyeed saxiixo waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

**MUQDISHO 24/11/2013**

XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
WAA LA DIIWAAN-GELIYEY
DIIWAAN NO.
TAARIIKH: 24/11/2013
SAXIIXA NO.

**Madaxweynaha J. F. S.**
**Mudane Xasan Sheekh Maxamuud**

**PRESIDENTIAL DECREE No. 132** DATE: 30/10/2013

# APPOINTMENT OF AN INTERIM GOVERNOR FOR THE CENTRAL BANK OF SOMALIA

## THE PRESIDENT OF THE FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

| | |
|---|---|
| **Having seen:** | Article 90, Paragraph 11 and Article 87 paragraph 2 of the Constitution of the Federal Republic of Somalia |
| **Having seen:** | The decision of the Council of Ministers Ref: SHGW0064.11.13, Date 28/11/2013 and the suggestion of the Prime Minister Re: XRW/MGC/00675/11/13 Date: 28/11/2013 regarding the nomination of a new Governor of the Central Bank of Somalia |
| **After Considering:** | The Experience and the CV of the appointee |
| **After Recognizing:** | The need for appointing the Governor of the Central Bank of Somalia |

**DECREES THE FOLLOWING:**

**Article 1**

On the date the President signs this decree, Mr, Bashir Isse Ali is appointed as an interim Governor of the Central Bank of Somalia for a period of ninety (90) days.

**Article 2**

This decree takes effect on the day it is signed by the President of the Republic of Somalia and will be published in the Official Bulletin of the Federal Republic of Somalia.

**MOGADISHO 30/11/2013**

**Madaxweynaha J. F. S.**
**Mudane Xasan Sheekh Maxamuud**

Magacaabis Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Federaalka Soomaaliyeed

**MADAXWAYNAHA J. F. S**

**Markuu arkay:** Qodobka 90, Farqadda 4aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Soomaaliya.

**Markuu garwaaqsaday:** Baahida loo qabo dhismaha Hey'adaha Dowladda gaar ahaan buuxinta Jagada Ra'iisul Wasaaraha ka dib markii Ra'iisul Wasaarihii iyo Xukuumaddiisii ay waayeen codka kalsoonida Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliyeed.

**Markuu Tixgeliyay:** Waayo-Aragnimada iyo Aqoonta uu leeyahay mudanaha loo magacaabayo xilkan Ra'iisul Wasaaraha

**Wuxuu Xeeriyay**

**Qodobka 1aad**

Laga bilaabo Maanta oo ay taariikhdu tahay 12ka bisha Disembar 2013, waxaa **Cabdiweli Sheekh Axmed Maxamed** loo magacaabay in uu noqdo Ra'iisul- Wasaaraha Xukuumadda Federaalka Soomaaliyeed.

**Qodobka 2aad**

Xeerkaan waxa uu dhaqan-gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxwaynaha Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliyeed waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ee Dowladda.

**MUQDISHO 12/12/2013**

Madaxwaynaha J. F. S.
Mudane Xasan Sheekh Maxamuud